



Jamhuuriyadda Somaliland  
**Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda**

# **Miisaaniyadda Dawladda Dhexe ee 2021**





## Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-609/122020

Taar: 27/12/2020

### Wareegto Madaxweyne

#### Dhaqan-galka Miisaaniyad Sannadeedka 2021-ka


- Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markaan Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markaan Arkay: Go'aanka Golaha Wakiillada, Go'aan Lr. GW/KF-44/893/2020, ee ku taariikheysan 26/12/2020, ee ay ku ansixiyeen Miisaaniyadda Sannadka 2021-ka;

#### Waxaan Soo-Saaray;

Dhaqan-galka Miisaaniyad Sannadeedka 2021-ka oo ka kooban Miisaaniyadda Dawladda Dhexe, Dawladaha Hoose, Hay'adaha Madaxbannaan iyo Deeqaha Caalamiga ah oo dhan SL.SH/= 2,881,916,764,333 (Laba Tirilyan, Siddeed Boqol Kow iyo Siddeetan Bilyan, Sagaal Boqol Lix iyo Tobban Milyan, Toddoba Boqol Afar iyo Lixdan Kun, Saddex Boqol Saddex iyo Soddon Shillin Somaliland ah). Miisaanaddu waxay dhaqan-gal noqon doontaa 01 January 2021.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi  
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland







Xafiiska Wasiirka

Ref: WM/02/08-01/ 2252/2020

Date: 08-12-2020

Ku: Shir-Guddoonka & Mudanayaasha Golaha Wakiilada

Hargeysa

**Ujeedo: Soo gudbinta miisaaniyadda Qaranka ee 2021-ka**

Mudane Guddoomiye, Guddoomiye K/Xigeenayaal & Mudanayaal;  
Aniga oo ka wakiila Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddada oo gudanaysa waajibka Dastuuriga ah ee Qaranka qodobkiisa 55<sup>aad</sup> farqadiisa 1.<sup>aad</sup> iyo xeerka Maamulka Maaliyaddada ee Xeer No. 75/2016 qodobkiisa 5<sup>aad</sup>, waxaan si weyn ugu farax-sanahay in Maanta oo ay taariikhdu tahay 08-12-2021 idiin soo gudbiyo Miisaaniyadda Dawladda ee Sannadka 2021 oo ah Miisaaniyaddii 30<sup>aad</sup> ee qarankani yeesho.

**Allah Mahad Leh.**



Dr. Sacad Cali Shire

**Wasiirka Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda.**

# Tusmada Buugga

<b>1.</b>	<b>HORDHAC</b> .....	<b>1</b>
<b>2.</b>	<b>GUUD-MARKA DHAQAALAHA</b> .....	<b>1</b>
<b>3.</b>	<b>HANTAAQOYINKA GUUD EE KU YIMID DHAQAALAHA</b> .....	<b>1</b>
3.1.	SAAMAYNTA CAALAMIGA AH EE XANUUNKA SAFMARKA AH EE COVID-19 .....	1
3.2.	AYAXA .....	2
3.3.	JOOJINTA XOOLIHII LOO DHOOFIN JIRAY XAJKA .....	3
3.4.	XAALADA QALA-LAASE EE KA JIRTA DALKA ITOOBIYA .....	3
<b>4.</b>	<b>SIYAASADDA SOMALILAND KAGA JAWAABTEY COVID-19</b> .....	<b>3</b>
<b>5.</b>	<b>WAXQABADKA DHAQAALAHA GUUD</b> .....	<b>4</b>
5.1.	SICIR-BARARKA .....	4
5.2.	SARRIFKA LACAGTA .....	5
5.3.	XAWAALADDAHA .....	6
5.4.	GANACSIGA & SOCDAALKA .....	8
5.4.1.	<i>Dhoofinta Xoolaha</i> .....	8
5.4.2.	<i>Soodejinta</i> .....	9
5.4.3.	<i>Tirada Konteenarada &amp; Maraakiibka Dekedda Berbera Timid</i> .....	11
5.4.4.	<i>Tirada Rakaabka ku Yimid Hawada</i> .....	12
<b>6.</b>	<b>MAALGELINTA IYO DHISMAHA</b> .....	<b>13</b>
6.1.	TIRADA RUQSADHA GANACSI EE LA BIXIYEE .....	13
6.2.	SIBIDHKA LA SOO DEJIYEE .....	14
<b>7.</b>	<b>SHAQAALAYSIIINTA DAWLADDA</b> .....	<b>15</b>
<b>8.</b>	<b>ROOBABKA/RAXMAADKA</b> .....	<b>15</b>
<b>9.</b>	<b>MUCAAWINOYINKA DIBADDA 2018</b> .....	<b>16</b>
<b>10.</b>	<b>WARBIXINTA WAXQABADKA MIISAANIYADDA 2020</b> .....	<b>16</b>
10.1.	DAKHLI URURINTA JAN-SEP 2020 .....	16
10.2.	KHARASH-GALKA DOWLADDA JAN-SEP 2020-KA .....	17
<b>11.</b>	<b>ODOROSKA DAKHIGA SANAD MIISAANIYADEEDKA 2021</b> .....	<b>17</b>
11.1.	GUUD-MARKA GUUD EE ODOROSKA DAKHIGA 2021-KA .....	18
11.2.	MEELAHA LA FILAYO IN UU KA YIMAADO KORODHKA DAKHLIGA 2021-KA .....	18
11.3.	FAAH-FAAHIN GOOBAHA UU DAKHLIGU KA IMANAYO 2021-KA .....	19
11.4.	DAKHLIGA KASTAMADA OO DEEGAMAYSAN 2021-KA .....	20
11.5.	DAKHLIGA CASHUURAHA BERIGA OO DEEGAMAYSAN 2021-KA .....	20
<b>12.</b>	<b>SIYAASADDA MIISAANIYADA 2021</b> .....	<b>20</b>
12.1.	MEELAHA MUDNAANTA LAGA SIIYEE MIISAANIYADDA 2021-KA .....	20
12.2.	SIYAASADDA MAALIYADDAEED (FISCAL POLICY) .....	21
12.2.1.	<i>Isku dheeli tirka Dakhliga iyo kharashka</i> .....	21
12.2.2.	<i>Kor u qaadida saamiga ay Cashuuraha berrigu ka yihiin Dakhliga guud</i> .....	21
12.2.3.	<i>Ilaalinta iyo kobcinta waxsoo-saarka gudaha</i> .....	22

12.2.4.	<i>Shaqaalaysiinta shaqaalihii ku meel gaadhka ku ahaa Wasaaraddaha iyo Hay'addaha</i> .....	22
12.2.5.	<i>Sii wadida Mashruuca Shaqo Qaran</i> .....	22
12.2.6.	<i>Kaydka ku -talo galka Dhacdooyinka lama filaanka (Contingency fund)</i> .....	22
12.2.7.	<i>Abuurida Sanduuqa Daryeelka Dhimirka</i> .....	22
12.2.8.	<i>Wareejinta kabka Dowladdaha Hoose si dhamaystiran</i> .....	22
12.2.9.	<i>Joojinta 0.5 Macaashal-Macaashkii Ganacsatada lagaga qadimi jirey Dekeda</i> .....	22
12.2.10.	<i>Abuurida Sanduuqa wax ka qabashada Xanuunka Covid-19</i> .....	22
12.2.11.	<i>Joojinta qaadista lacagaha aan sharciga ahayn (illegal fees)</i> .....	23
12.2.12.	<i>Fududeynta Nidaamka Cashuur bixinta</i> .....	23
12.2.14	<i>Hirgalinta dhamaan qaybihiisa kala duwan nidaam Xisaabeeda iswada ee (SLFMIS)</i> .....	23
12.2.15	<i>Ka qayb qaadashada Diyaarinta Miisaaniyadda ee Bulshada rayidka ah</i> .....	23
12.2.16	<i>Waxyaabaha la xusi karo ee talooyinka laga tixgeliyey</i> .....	23
12.3	SIYAASADDA LACAGEED (MONETARY POLICY).....	24
12.3.1	<i>Sicir bararka</i> .....	24
12.3.2	<i>Isku bedelka Sarifka lacagaha</i> .....	24
<b>13</b>	<b>SAAMIGA WADAAGAYAASHA EE MIISAANIYADDA 2021-KA</b> .....	<b>24</b>
13.3	AMAANKA.....	25
13.4	MAAMULKA .....	25
13.5	CAAFIMAADKA .....	26
13.6	WAXBARSHADA.....	27
13.7	TAMARTA .....	27
13.8	WAXSOO-SAARKA.....	27
13.9	DEEGAANKA .....	28
13.10	BIYAHA.....	28
13.11	DHAQAALAHA .....	28
13.12	KAABAYAASHA DHAQAALAHA .....	29
13.13	WADAAGAHA KALE (CROSS-CUTTING SECTOR).....	29
<b>14</b>	<b>SOO KOOBIDA QEYBAHA MIISAANIYADDA 2021-KA</b> .....	<b>30</b>
14.3	KHARASHKA SHAQAALAHA .....	31
14.4	HAWL SOCODSIINTA .....	31
14.5	HANTIDA RAAGTA .....	31
14.6	MASHAARIICDA KALE EE DAWLADDA.....	32
14.7	KAALMOOYINKA DAWLADDA .....	32
14.8	DAYNTA QARANKA .....	32
14.9	KEYDKA QARANKA IYO KHARASHKA LAMA FILAANKA AH .....	32
<b>15</b>	<b>MASHAARIICDA AY MAALGELIYAAN QAADHAAN BIXIYAYAASHU (WORLD BANK, SDF AND JPLG)</b> .....	<b>33</b>
15.3	MASHRAARIICDA BAANKA ADUUNKA .....	33
15.3.1	<i>Mashruuca Dib u Habaynta Shaqaalaha Dawladda</i> .....	33
15.3.2	<i>Mashruuca Horumarinta korontada</i> .....	33
15.3.3	<i>Mashruuca Dib u Habaynta Maamulka Maaliyaddada Qaranka</i> .....	34
15.4	SANDUUQA HORUMARINTA SOMALILAND (SDF).....	34
15.5	MASHRUUCA MAAMUL DAADAJINTA DAWLADHA HOOSE (JPLG) .....	34
<b>16</b>	<b>APPENDIX</b> .....	<b>36</b>
	APPENDIX 1: MASHAARIICDA, DHISMAYAASHA IYO IIBSIGA HANTIDA EE MIIS 2021-KA .....	36
	APPENDIX 2: IFTIIMINTA & QABYO TIRKA XEERKA DAKHLIGA 72/2016 .....	39
1.	KHALADKA YIMI XAGA QORISTA (6 LIX QODOB).....	39
2.	SIXITAANKA KHALADAADKA FARSAMO (29 QODOB) .....	39
3.	QODOBO MEESHOODI SAXDA AH LOO RARAY ISLA MARKAANA LAGA TIRTIRAY HALKII HORE ( 4 QODOB) .....	40
4.	KODHIN, KAABIS IYO WAX-KABEDEL (29 QODOB) .....	41

<b>Dakhliga Guud ee Deegaamaysan 2021</b> .....	<b>39</b>
<b>Dakhliga Guud ee 2021</b> .....	<b>41</b>
<b>Miisaaniyadda Guud 2021</b> .....	<b>43</b>
<b>Qorshaha Miisaaniyadda ee Qaybaha Dalka</b> .....	<b>45</b>
<b>Qorshaha Isticmaalka ee Miisaaniyadda 2021</b> .....	<b>48</b>
<b>Mashaariicda Deeqaha Dibedda 2021</b> .....	<b>56</b>

## **Miisaaniyadda Dawladda**

Qasriga Madaxtooyada JSL.....	64
Madax-weyne ku-Xigeenka JSL. ....	65
Komishanka Qaranka ee Xakamaynta HIV/ AIDS .....	66
Golaha Guurtida JSL. ....	68
Golaha Wakiilada JSL.....	70
Maxkamadda Sare. ....	72
Max-kamadda Hoose.....	74
Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka.....	76
Hay'adda Shaqaalaha Dawladda.....	78
Hanti-dhawrka Guud ee Qaranka.....	80
Xafiiska Madaxtooyadda. ....	82
Ciidanka Ilaaladda Madaxtooyada.....	84
Garyaqaanka Guud .....	86
Hayadda Sirdoonka Qaranka.....	88
Jimciyadda Muj.Sooyaal .....	90
W.Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah .....	91
Wasaaradda Cadaaladda & Garsoorka.....	93
Ciidanka Asluubta.....	95
Guddiga Xaquuqal Insaanka Qaranka.....	97
Wasaaradda Arrimaha Gudaha. ....	99
Ciidanka Booliska. ....	101
Ciidanka Ilaalada Xeebaha.....	103
Ciidanka Socdaalka. ....	105
Ciidanka Dab-Demiska Qaranka Somaliland.....	107
"W.Warfaafinta, Wacyigelinta iyo Dhaqanka".....	108
Wasaaradda Gaashandhigga. ....	110
Ciidanka Qaranka.....	112
W.Qorshaynta & Horumarinta Qaranka .....	114

Wasaaradda H. Maaliyadda.....	116
“Wasaaradda Ganacsiga, Warshadaha iyo Dalxiiska”.....	119
Wasaaradda Macdanta & Tamarta.....	121
Komishanka Tamarta .....	123
Wasaaradda Gaadiidka iyo H. Jidadka .....	125
Wasaaradda H. Beeraha. ....	127
Wasaaradda Xanaannada Xoolaha iyo H. Kalumaysiga .....	129
Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Tignoolojiyada.....	131
Wasaaradda Waxbarashada & Sayniska .....	133
Agaasinka Tacliinta sare.....	136
Gudiga Tacliinta Sare .....	138
Wasaaradda H. Caafimaadka.....	140
Komishanka qaranka ee Mihnadlayaasha caafimadka.....	143
Wasaaradda Diinta & Awqaafta.....	145
Hay’adda Diiwaanka Sakada iyo Safalka .....	147
“Wasaaradda Hawlaha Guud,Dhulka & Guriyaynta” .....	149
H. Duulista & Hawada. ....	151
Wasaaradda Xidh Golayaasha iyo Arimaha Distorka .....	153
Komishanka dib u habaynta shuruucda .....	155
“Wasaaradda Shaqagalinta, A. Bulshada & Qoyska”.....	156
Wasaaradda Ciyaaraha iyo Dhalinyarada.....	158
Guddiga Doorshooyinka Qaranka. ....	160
Guddiga Qandaraaska Qaranka.....	162
Hayada u Diyaargarowga Aafooyinka iyo Kaydka .....	164
Hay’adda Dhawrista Tayada .....	166
Gudida Maamulwanaaga iyo La-dagaalanka Mus.....	168
Hayada Qaxootiga iyo Barakacayaasha .....	170
Wasaaradda Degaanka & Horumarinta Reermiyiga .....	172
Guddida Diwaangalinta Ururada .....	174
Wasaarada H. Maalgashiga.....	175
Wasaaradda H. Biyaha .....	177
Mashaariicda Deeqaha Debedda.....	179
Appendix 2 (Lifaaqa Labaad).....	180

## Liiska Shaxaha

<b>Shaxda 1:</b> Miisaaniyadda Guud ee 2020-ka.....	1
<b>Shaxda 2:</b> Odoroska Bangiga Horumarinta Afrika (AfDB) uu ku sameeyey Waxsoosaarka Guud ee Gudaha (GDP) ee xul Waddamo ah oo ganacsi-wadaag ay leeyihiin Somaliland, 2019 – 2021 .....	2
<b>Shaxda 3:</b> Sicir-bararka Sannadlaha & Billaha ah ee Qaybaha Waaweyn. Sannadka laga Duulayo = 2012 .5	
<b>Shaxda 4:</b> Qiimaha Soo dejinta Badeecooyinka Dhanka Qiimayaasha Jan-Sep 2019 iyo 2020, SLSh .....	10
<b>Shaxda 5:</b> Qiimaha Soo dejinta Badeecooyinka Dhanka Cashuurta intii u dhexeysay January ilaa September 2020.....	10
<b>Shaxda 6:</b> Tobanka Badeeco ee u Sarreeyey Soodejinta Dhinaca Qiimaha ee January ilaa September 2020 .....	10
<b>Shaxda 7:</b> Tobanka Badeeco ee u Sarreeyey Soodejinta Dhinaca Cashuuraha ee January ilaa September 2020 .....	11
<b>Shaxda 8:</b> Tiradda Konteenarrada Yimid Dekedda Berbera, Jan-Sept 2019 iyo 2020.....	11
<b>Shaxda 9:</b> Tirada Maraakiibta ee Sadexbiloodka ah ee Berbera Yimid Jan-ilaa Sep 2019, 2020 .....	11
<b>Shaxda 10:</b> Nooca & Tirada Maraakiibta Timi Dekedda Berbera January ilaa Sep 2019 iyo 2020.....	12
<b>Shaxda 11:</b> Tirada dadka Rakaabka Dhoofay ama Soo Degey bilaha, Jan – Sept 2019 iyo 2020 .....	12
<b>Shaxda 12:</b> Tirada Ruqsadaha la Bixiyey Jan – Sept 2019 and 2020.....	13
<b>Shaxda 13:</b> Tirada kiishashka Sibidhka ee la soo Dejiyey Jan – Sept 2019 and 2020 .....	14
<b>Shaxda 14:</b> Shaqaalaha Dawladda Dhexe 2014 ilaa 2020 .....	15
<b>Shaxda 15:</b> Deeqaha Dibedda iyo meelaha ay ka Fuleen Sannadaha 2017 & 2018, US Dollar .....	16
<b>Shaxda 16:</b> Isticmaalka Miisaaniyadda Jan-Sep 2020.....	17
<b>Shaxda 17:</b> Soo Koobida Guud ee Dakhliga 2021-ka .....	19
<b>Shaxda 18:</b> Soo koobida Qaybaha Odoroska Dakhliga 2021-ka .....	19
<b>Shaxda 19:</b> Dakhliga Kastamada oo Deegamaysan 2021-ka .....	20
<b>Shaxda 20:</b> Dakhliga Cashuuraha Beriga oo Deegamaysan 2021-ka .....	20
<b>Shaxda 21:</b> Meelaha Mudnaanta la siiyey Miisaaniyadda 2021-ka.....	21
<b>Shaxda 22:</b> Saamiga Wadaagayaasha Miisaaniyadda 2021 .....	24
<b>Shaxda 23:</b> Wadaagaha Amaanka iyo Difaaca .....	25
<b>Shaxda 24:</b> wadaagaha Maamulka .....	26
<b>Shaxda 25:</b> Wadaagaha Caafimaadka.....	26
<b>Shaxda 26:</b> Wadaagaha Waxbarashada .....	27
<b>Shaxda 27:</b> Wadaagaha Tamarta.....	27
<b>Shaxda 28:</b> Wadaagaha Waxsoo-saarka .....	28
<b>Shaxda 29:</b> Wadaagaha Deegaanka.....	28
<b>Shaxda 30:</b> Wadaagaha Biyaha Biyaha .....	28
<b>Shaxda 31:</b> Wadaagaha Dhaqaalaha .....	29
<b>Shaxda 32:</b> Wadaagaha Kaabayaasha Dhaqaalaha .....	29
<b>Shaxda 33:</b> Wadaagaha kale (cross-cutting sector).....	30
<b>Shaxda 34:</b> Soo koobida Qeybaha Miisaaniyadda 2021 .....	30



## Liiska Jaantuusyada

<b>Jaantus 1:</b> Sicir-bararka Sannadlaha ah ee Qaybaha Waaweyn. Sannadka Laga Duulayo=2012 .....	5
<b>Jaantus 2:</b> Heerka Sarrifka Shilinka Somaliland ee USD & Heerka Sicir-bararka u sarreeyey, Jan 2018— Sep 2020.....	6
<b>Jaantus 3:</b> Tirada Rakaabka Dhoofay iyo kuwa soo Degey oo Bille ah 2019 iyo Sep 2020,.....	13
<b>Jaantus 4:</b> Tirada Ruqsadaha la bixiyey oo bille ah 2018-2020 .....	14
<b>Jaantus 5:</b> Tirada kiishashka Sibidhka ee la soo Dejiyey ilaa 2018 .....	15
<b>Jaantus 6:</b> Shaqaalaysiinta Dawladda Dhexe2014 ilaa 2020 .....	15
<b>Jaantus 7:</b> Cabirka Heerka Roobabka (MM) ee laga Diiwaangeliyey Aagag Kala Duwan Jan ilaa June 2020 .....	16
<b>Jaantus 8:</b> Saamiga Dakhliga ay ka yihiin Cashuuraha Berrigu, Kastamadu iyo Wasaaraddaha kale 2019- 2021 .....	19
<b>Jaantus 9:</b> Saamiga Wadaagaysaasha ee Miisaaniyadda 2021 .....	25
<b>Jaantus 10:</b> Soo koobida Qeybaha Miis 2021 .....	31
<b>Jaantus 11:</b> Deeqaha Qaadhaan bixiyayaasha ee Miisaaniyadda 2021-ka.....	33



Jamhuuriyadda Somaliland  
**Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda**

## 1. Hordhac

Miisaaniyadda 2021 waxay ka kooban tahay Miisaaniyadda Dawladda Dhexe, Miisaaniyadda Hayadaha Madaxa banaan ee Dawladda, Miisaaniyadda Dawladaha Hoose, Miisaaniyadda Sanduuqa Horumarinta Somaliland ee ay maalgeliyaan wadamada Deeq bixiyeyaashu (Somaliland Development fund), Miisaaniyadda Mashuuca Maamul-daadejinta (JPLG) iyo Miisaaniyadda Masaariicda baanka Aduunka. Isugeynta guud ee Miisaaniyadda sannadka 2021 waa **2,881,916,764,333 slsh** sida shaxda hoose ka muuqata. Miisaaniyadda dawladda dhexe waa **2,101,500,000,000 SLSH**, taas oo ka badan tii hore **55,500,000,000 slsh** una dhiganta **2.7%**.

**Shaxda 1:** Miisaaniyadda Guud ee 2020-ka

	<b>Miisaaniyadda 2020</b>	<b>Miisaaniyadda 2021</b>	<b>Faraqa</b>	
Miisaaniyadda Dowladda Dhexe	2,046,000,000,000	2,101,500,000,000	55,500,000,000	
Miisaaniyadda Dowladdaha Hoose	315,595,406,881	368,002,568,138	52,407,161,257	
Miisaaniyadda Hay'addaha Madaxa -banaan	242,036,387,917	247,784,583,075	5,748,195,158	
Miisaaniyadda Mashaariicda Baanka Aduunka	55,637,211,000	63,917,897,120	8,280,686,120	
Miisaaniyadda Sanduuqa (SDF)	74,764,851,000	88,111,716,000	13,346,865,000	
Miisaaniyadda Mashruuca Maamul-daajjinta (JPLG)	15,949,367,000	12,600,000,000	(3,349,367,000)	
<b>Wadarta Guud</b>	<b>Sl.sh</b>	2,749,983,223,798	2,881,916,764,333	131,933,540,535

## 2. Guud-marka Dhaqaalaha

Ka dib sannado koboca dhaqaale uu cago-jiid ahaa, dhaqaalaha Somaliland waxa uu sameeyey koboc laga soo bilaabo 2018. Siyaasadaha dawladdu qayb ayay ka ahaayeen u-saldhigidda ascaarta oo lagu hakiyey halkii u hooseysey muddo laba sannadood ah, taas oo keentay in Shilinka Somaliland kor u soo hinqado. Kor-u-kacii dhaqaalaha ayaa soo laabtay, muggii ganacsiguna dib ayuu u laxaadsaday. Soo-Xoogaysashada dhaqaalaha oo ay raacday dib-u habeynta dawladdu ku samaysay hawlaha Maaliyaddada, waxa ay keentay in haynta dawladdu korodho taas oo suurtagelisey in awoodda dawladdu ay u leedahay fidinta adeegyadii iyo mashaariicdii uu u baahnaa muwaadinku. Sannadkan 2020-ka iyo muddada dhexeba dawladdu waxa ay filaysey kobocyo kale oo ka muuqda haynta dawladda iyo in la kordhiyo kharashyada loogu talo galay horumarinta oo mahaddeeda in badan ay leedahay dib-u-qaabaynta lagu sameeyey cashuuraha.

Waxa se saameeyey oo oo karaar-jebiyey kor-u-kacan saamaynta taban ee COVID-19, Dhoofkii Xoolaha ee Xajka, Xaalada Itoobiya ee aan degenayn iyo ayaxa. Fulinta mashaariicdii horumarineed ee dawladda ayaa durba hakad galay. Waxa intaa dheer in muujiyayaasha furaha ah ee dhaqaaluhu muujinayaan in saamaynta sii kordheysa oo taban uu safmarka COVID-19 iyo ayaxu ku yeeshen dhaqaalaha Somaliland.

## 3. Hantaaqooyinka Guud ee ku yimid Dhaqaalaha

Somaliland Caalamka intiisa kale ayay kaga xidhan tahay xidhiidhada dhaqaale iyo kuwa diblumaasiyadeed ee sii kordhaya. Hoos-udhaca dhaqaale ee dunida ku Yimid ee ay la yimaaddeen safmarka COVID-19 iyo Ayaxa duullaanka ahi, sidaa darteed, waxa uu saamaynta taban oo daran ku yeelanayaa dhaqaalaha maxalliga ah (sida ganacsiga oo is dhima, xawaaladaha, deeqaha, khayraadka ama dakhliga dawladda oo yaraada, iwm.). Fahamka iyo axadhidda saamaynta shoogaggani muhim ayay u tahay saadaalinta doorsoomayaasha dhaqaalaha guud iyo xulashada siyaasado hufan oo meelmar noqon kara oo Maaliyaddaada ama lacageed muddada dhexe.

### 3.1. Saamaynta Caalamiga ah ee Xanuunka Safmarka ah ee COVID-19

Laga soo bilaabo dabayaaqadii Sannadkii 2019, safmarka COVID-19 waxa uu caalamka ku hayey khasaare nafeed iyo mid Dhaqaale oo sii kordhaya iyada oo 55.6 Million oo qof laga helay cudurka, in ka badan 1.3 Million oo dhimasho ahna la diiwaangeliyey ilaa hadda. Badbaadinta noloshada dadka iyo ka-diyaargarowga caafimaad waxa ay kulliftay in karantiimooyin la sameeyo, la kala fogaado, la xidho meelo badan, oo meheredo iyo ganacsiyo badan albaabada loo laabo. Tallaabooyinka

lagu xakamaynayo cudurka ee dunidu qaadatay waxa ay culays laxaad leh saareen dhaqaalihii iyada oo ay kala go'een qulqulkii ganacsiga, la waayey dakhli, shaqo la'aani timid, ganacsiyadii xidhmeen, dakhligii dawladda gabaabsiyey ama laga leexiyey meelihii horumarinta loogu talo galay ka hor Covid-19. Waxa kale oo safmarku saamayn weyn ku yeeshay qiimaha saliidda oo la filayo inuu sii ahaado wax ka yar US\$45 barmilkiil ilaa laga gaadho 2023, oo ka yar 25% celceliska qiimaha 2019 oo tusaysa in baahidii dunidu u qabtay saliidda yaraatay. Halka dawladda saliidda dhoofiya ay soo wajahday khasaare baaxad leh, kuwa soo dhoofsada, sida Somalilandna, faa'iido ayay u noqotay.

Haddii tallaabooyinka dawladda hore u maray ay kula tacaalayaan safmarka lagu guuleysto, waxa ay saamayn togan ku yeelan doontaa dawladda soo koraya oo ku tiirsan xawaaladaha iyo deeqaha. Hay'adda Lacagaha Dunidu (IMF) waxa ay tilmaamaysaa inaan la hubin in dhaqaalaha dunidu si dhakhso ah uga soo kaban Karin saamaynta dhaqaale ee safmarka iyada oo ku xidhan sida ay u hanaqaadaan ama waxtar u yeeshaan tallaabooyinka xakamynta ee la qaaday, helitaan tallaala, dabecadaha iyo dhaqamada dadka oo wax iska beddelaan, xayiraadaha oo yaraada, iwm. Hay'adda Lacagaha Dunida (IMF) waxa ay dib u qiimaysay saamaynta COVID-19 ee dhaqaale iyada oo saadaalinaysa in dhaqaalaha dunidu hoos u dhici doono -4.9% sannadka 2020 inta aanu kor u kicin 5.4% sannadka 2021 - oo ka dhigan kor u kac iyo hoos u dhac -1.9% 2020 iyo 0.4% 2021 qiyaasihii la sameeyey April. Dhaqaalaha dalalka Afrika ee ka hooseeya Saxaaraha, waxa la saadaalinayaa inay hoos u dhacayaan -3.2% sannadka 2020 ka hor inta aanay kor u soo kicin 3.4% sannadka 2021. Bangiga Horumarinta Afrika waxa uu dhinaciisa ka saadaalinayaa in Waxsoosaarka Guud ee Afrika uu hoos u dhici doono -1.7% marka la qaato saamayn taban oo aan sii ridnayn, halka haddii mid taa ka mug weyn lagu eego uu hoos u dhici karo ilaa -3.4%. Waxa la rajaynayaa dib-u-soo-kaabasho dhan 3% in la helo 2021-ka oo aan wax sii buuran ka tari Karin hoos-u-dhaca Waxsoosaarka Guud oo lagu qiyaasayo US\$173 Bilyan ilaa 236.7 Bilyan oo Doolar sannadaha 2020 ilaa 2021 oo safmarku sababay. Soo-kabashada waddamada xidhiidhka ganacsi ka dhexeeyo Somaliland ee Kenya, Itoobiya, Jabbuuti iyo Uganda ayaa la filayaa inay aad u gaabiso (Arag *Jaantus 3* ee hoose), halka iyagana waddamada Saudi Arabia, Imaaraadka, Thailand iyo Malaysia ayaa waxa la saadaalinayaa in hoos-u-dhac baaxad lihi ku iman doono dhaqaalahooda sannadka 2020.

**Shaxda 2:** Odoroska Bangiga Horumarinta Afrika (AfDB) uu ku sameeyey Waxsoosaarka Guud ee Gudaha (GDP) ee xul Waddamo ah oo ganacsi-wadaag ay leeyihiin Somaliland, 2019 – 2021

		COVID-19 LA'AANTII			COVID-19 UU JIRO (HALKA U HOOSAYSA)		COVID-19 UU JIRO (HALKA U DARAN)	
		2019	2020	2021	2020	2021	2020	2021
KENYA	WGG Dhab ah (%)	5.7	6.0	6.2	1.4	6.1	0.6	5.7
	Sicirbararka (%)	5.1	5.1	5.2	5.6	4.9	5.7	4.6
ETHIOPIA	WGG Dhab ah (%)	9.0	7.2	7.1	3.6	5.5	2.6	3.1
	Sicirbararka (%)	15.8	12.1	9.1	15.3	8.6	15.5	9
DJIBOUTI	WGG Dhab ah (%)	6.0	6.0	6.2	1.0	5.5	-0.5	5.2
	Sicirbararka (%)	2.2	2.0	1.8	2.7	1.0	3.5	1.4
UGANDA	WGG Dhab ah (%)	5.0	6.2	6.1	2.5	3.5	1.6	4.2
	Sicirbararka (%)	2.9	3.8	4.5	4.6	4.8	5.3	5

*II-Wareed: AfDB's African Economic Outlook 2020 Supplement*

### 3.2. Ayaxa

Waddanka Somaliland iyo dhawr waddan oo Bariga Afrika ah waxa ay haatan la ciircirayaan laba aafu oo ku habsaday bilihii la soo dhaafay kuwaas oo dhaqaalahoodii iyo nolol-maalmeedkoodiiba halis geliyey. Wakhtigan oo dawladdu hamigoodii iyo falcelintoodiiba u jeediyeen la-tacaalidda saamaynta bulsheed iyo dhaqaale ee safmarka COVID-19, wakhti u dhigma lama siin xakamaynta dhibaataada ayaxa. Saamaynta uu duullaankani yeeshay, ma aha mid la fileyey. Sannadkan horraantiisii, mawjado ayax ah ayaa ku habsaday waddamada Bariga Afrika isaga oo waxyeello weyn u geysatay dalagyadii la beeray. Wakhtiyada uu u darnaa, waxa la qiyaasay inuu 1.8 malyuun oo tan oo caleen iyo dalag ah ayaxu maalintii cunayey. Bilaha January iyo February ayuu aad u dhex jibaaxay waddamada Somalia, Somaliland, Kenya iyo Ethiopia. Hay'adda Cuntada Adduunka ee FAO waxa ay hore saadaalisay mawjado cusub oo Ayaxa bilihii la soo dhaafay, iyada oo si



gaar ah loogaga digay waddamada Itoobiya, Sudan, Koonfurta Sudan, Pakistan iyo Hindiya, siiba muddooyinka u dhexeeyey June ilaa July<sup>1</sup>

Waxa muuqata in duullaankii ayaxu horseedey waxsoosaarka beeraha oo aad hoos ugu dhacay waddamada uu saameeyey, ascaarta quutal-daruuriga oo kor u kacday, dakhligii oo yaraaday iyo dhaqaalahii beeraleyda waddamada Bariga Afrika oo si baaxad leh hoos ugu hoobtay. Waxa dhibtan sii xoojineysay kala-go'a ganacsiga iyo hoos-u-dhaca celceliska dakhliga ee saamaynta safmarka COVID-19 iyo ayaxu wadajir ula yimaaddeen. Tani waxa ka dhalatay in malaayiin dad ah ay soo foodsaartay saboolnimo ba'ani.

### 3.3. Joojinta Xoolihii loo Dhoofin jiray Xajka

Sidaan wada ognahay, waxa sannadkan dalka Sucuudigu joojiyey imaatinkii gudashada Xajka sababo la xidhiidha Xanuunka Covid-19 awgeed, kaas oo aanu u dhoofin jirtay Xoolo badan wakhtiga Xajka.

Sidaa awgeed, xayiraadaa sucuudigu saaray imaatinka Xajka waxa ay inugu keentay in Dhaqaalihii inaga soo geli jiray dhoofinta Xoolaha wakhtiga Xajka la waayo, isla markaana uu is dhimo dakhligii aan hore ugu qoondaynay in uu inaga soo galo.

### 3.4. Xaalada qala-laase ee ka jirta Dalka Itoobiya

Itoobiya waa dal aynu jaar nahay kaas oo ay mudooyinkii dambe ka taagnaayeen Xaalad qalaqaase, isla markaana ay saameyn Amni iyo mid dhaqaalaba inagu keeneeyan hadba waxa ka dhacaya.

Hadaba, intii xaaladan degenaasho la'aantu ka jirtay Itoobiya, waxa muuqata in uu is dhimay dakhligii aan ka heli jirnay badeecooyinkii u gudbi jiray dhanka Itoobiya, isla markaana ay mararka qaar hakad galaan badeecooyinka dhankooda inooga iman jirtay sida Qaadka iyo Khudaarta. Kuwaas oo wax yeeleeyey guud ahaan Dakhliga.

## 4. Siyaasadda Somaliland Kaga Jawaabtey COVID-19

Dawladda Somaliland si aan ka-daba-tag ahayn ayay uga falcelisey safmarka COVID-19 iyadoo tallaabooyin xakamayn ah qaaday, una weecisey qoondooyin lacageed Caafimaadka si loola tacaalo aafada. Albaaba-xidhad qayb ah ayaa lagu sameeyey dalka bishii March, taas oo saamaysay ama laga hirgeliyey hay'adaha dawladda, dugsiyada, jaamacadaha, hudheellada, wakaaladaha socdaallada, garoomada ciyaaraha iyo gaadiidka dadweynaha. Waxa kale oo dawladdu muddo bil ah, oo ku beegantay Ramadaan, xayirtay soo-gelinta qaadka, waxana la xidhay goobihii lagu iibin jirey. Inkasta oo tallaabooyinkani culays dhaqaale ku keeneen dalka, haddana waxa ay u ahayd daruuri xakamaynta safmarka iyo fidityaankiisa, waana in loo arkaa maalgelin mustaqbalka noloshu dadweynaha iyo faydaqabka dhaqaalaha in loo sameeyey.

Dawladdu waxa ay soo rogtey dhawr tallaabo oo Maaliyadda ee ay kaga falcelineyso aafada safmarka si loo fududeeyo culayska dhaqaale ee uu saaray dadweynaha iyo ganacsiga yaryar. Tallaabooyinkan waxa ka mid ahaa:

1. Hal Malyuun oo Doolarka Maraykanka ah oo lagu daray sanduuq qoysaska danyarta ah lagu taakulaynayo.
2. 1 Malyuun oo Doolar oo lagu badhitaarayo meheradaha yaryar ee uu saameeyey safmarka Xanuunka Covid-19 dawladdu ku dartay
3. Furidda xisaab kale oo loogu talo galay ka-hortagga waxyeellooyinka caafimaad ee safmarka COVID-19 oo dawladdu ku dartay US\$ 1.5 Malyuun.
4. Hal malyuun oo dolaar oo loogu talo galay in dalaga lagaga iibsado beeraleyda (dalag kaab)
5. Cashuurta soo-dejinta oo laga dhimay 20%;
  - a. Daqiiqda/Burka
  - b. Bariiska
  - c. Sonkorta
  - d. Baastada

6. Cashuurta oo laga dhaafay qalabka caafimaadka ee ay ka midka yihiin:
  - a. Qalabka gooniyaynta/karantiimaynta
  - b. Neef-gargaarayaasha
  - c. Af-xidhada (masks)
  - d. Gacmo-gashiga dawaysan
  - e. Xummad-cabbirayaasha (madaxa)
  - f. Xummad-cabbirayaasha (Jidhka)
  - g. Jeermis-dilayaasha gacmaha/faradhaqa
7. Waxa kale oo dawladdu ka codsatay deyn-bixiyayaasha, baananka iyo ganacsatada waaweyn inaanay culays weyn iyo qaanan xilligan saarin macaamiisha; iyo weliba, inay dhiirrigeliyaan maalgelinta.
8. Waxa kale oo dawladdu si dhow isha ugu haysa ascaarta qutal-daruuriga, qalabka caafimaadka, iwm. Si ay degdeg uga jawaabi karto xaaladaha uu la yimaaddo safmarku.

Intaa waxa dheer, in dawladdu iyada oo filaysa in dakhli-ururintu hoos u dhacdo 2020, inay xayiraad saartay kharashgalka waxyaabaha ama qaybaha qaarkood ee ku xusnaa Miisaaniyadda qaranka sida kharashaadka Hawl-socodsiiinta iyo mashaariicda horumarinta. Hay'adaha iyo wakaaladaha dawladda qaarkood ayaan lagu fulin xakamaynta kharashgallada, sida Ciidamada Qalabka Sida, Maxkamadaha Hoose, Hay'adda U-diyaargarowga iyo Ka-hortagga Aafooyinka & Kaydka Cuntada Qaranka iyo Wasaaraddaha Beeraha iyo Xoolaha. Xakamayntani waa mid muddo kooban ah oo dib loo eegi doono iyada oo loo eegayo sida hadba dakhli-ururintu u dhacdo iyo fiditaanka ama hakinta safmarka COVID-19 sida loogu guulaysto.


## 5. Waxqabadka Dhaqaalaha Guud

### 5.1. Sicir-bararka

Waxa muuqatey Sagaalka bilood ee sannadka 2020, in heerka qiimayashu hoos u dhaceen marka la barbardhigo xawligii kor u kaca bilihii la midka ahaa ee 2019. Sicir-bararku waxa uu ahaa bishii Sep 2020 , 6.0% isaga oo ka soo noqday 7.1% uu ahaa August iyo 6.8%- uu ahaa July 2020. Marka bille loo eego, heerka sicirbararku waxa uu celcelis ahaan kacay 0.1% bishii July halka uu 0.4% kacay bishii August, balse uu hoos u soo dhacay 0.8% bishii September—kana dhigan in heerka celceliska ascaartu hoos u dhaceen 0.1% sadex biloodka July-Sep. Hoos u dhaca celceliska ascaarta ee Sadexbiloodka 3aad waxa loo nisbayn karaa hoos u dhaca ascaarta cuntada iyo dalagga ee bilaha August iyo September. Celceliska sanadlaha ee Ascaarta dalagga iyo cuntadu waxa heerkoodu hoos u dhacay 18.9% bisha August iyo 11.2% bisha September halka uu 21.3% si xawliya kor ugu kacay bishii July. Waana kor u kicii ugu sareeyey tan iyo bishii March 2018.

Ififaalaha xaalada sadexda bilood ee soo socdaa waa mid aad u adag in la saadaaliyaa, maadaama ay wali jiraan xaaladihii uu keenay Xanuunka Safmarka ee Covid-19. Inkastoo xayiraadihii dhanka socdaalka badi Caalamaku qaaday, hadana waxaynu filaynaa in kor u kaca ascaarta badeecaduhu kor u kacaan maadaama laga cabsi qabo in xanuunku soo laba kacleeyo oo sida hadaba muuqata ay bilaabantay wajigii labaad ee Covid-19 (second Wave)

**Jaantus 1:** Sicir-bararka Sannadlaha ah ee Qaybaha Waaweyn. Sannadka Laga Duulayo=2012



**II-Wareed:** Wasaaradda Qorshaynta & Horumarinta (MoNPD)

**Shaxda 3:** Sicir-bararka Sannadlaha & Billaha ah ee Qaybaha Waaweyn. Sannadka laga Duulayo = 2012

Bil	Sicirbararka u Sarreeya		Sicir-bararka Aasaasiga ah		Quudka & Dalagga		Tamarta, Shidaalka, Korontada/Biyaha	
	YoY	MoM	YoY	MoM	YoY	MoM	YoY	MoM
Oct-19	4.0%	0.5%	4.3%	0.7%	10.9%	1.4%	-7.1%	-2.3%
Nov-19	4.5%	0.6%	5.4%	1.3%	6.1%	-4.7%	-6.3%	0.0%
Dec-19	4.6%	0.6%	5.6%	0.3%	6.6%	2.2%	-6.7%	0.9%
Jan-20	4.6%	0.5%	5.0%	0.1%	7.4%	3.8%	-3.2%	0.5%
Feb-20	5.3%	0.6%	5.3%	0.5%	9.7%	1.5%	-0.5%	0.1%
Mar-20	6.0%	1.1%	5.0%	0.1%	16.7%	7.3%	0.1%	1.6%
Apr-20	6.3%	1.1%	6.0%	1.4%	18.1%	1.6%	-6.2%	-6.0%
May-20	6.2%	0.8%	6.1%	0.8%	18.3%	1.3%	-8.4%	-0.7%
Jun-20	6.9%	0.7%	6.2%	0.3%	20.7%	2.3%	-4.6%	2.6%
Jul-20	6.8%	0.1%	6.0%	0.0%	21.3%	0.7%	-3.0%	2.0%
Aug-20	7.1%	0.4%	6.5%	0.9%	18.9%	-1.6%	-2.6%	-1.0%
Sep-20	6.0%	-0.8%	6.2%	-0.2%	11.2%	-4.6%	-2.5%	0.0%


## 5.2. Sarrifka Lacagta

Bishii September ee 2020, sarrifka Shilinka ee Doolarka maraykanka waxa uu suuqa ka ahaa SISHs 8,650, taas oo la mid ah inuu kor uga soo kacay halkii uu taagnaa SISHs 8,550/USD bishii August ee ka horreysey oo ka dhigan inuu Shilinku hoos u dhacay 1.2%. Celceliska sarrifka Shilinka ee Sadexbiloodka 3aad wuxu ahaa 8,567SLSH/USD, taasoo la mid ah inuu 0.9% shilinku hoos u dhacay marka loo eego Rubacii 2aad halka uu 0.02% hoos u dhacay marka loo eego Rubacii 1aad iyo 1.8% uu qiimaha Sarrifku hoos u dhacay marka loo eego isla sagaalkii bilood ee sanadkii 2019. Shaxdan 2aad ee hoose waxay ina tusaysaa in sicir-bararka iyo sarrifka shilinka Dollarku ay si isku mid ah iskula socdeen tan iyo bishii January 2018. Si kastaba ha ahaatee, waxa la filayaa in qiima dhaca sarrifka Shilinka ee Doolarkka Maraykanka la yareeyo marka la gaadho Sadexbiloodka 4aad ee Sannadka, isla markaana la rajaynayo in qiimaha shilinku sare u kaco una dhaxayn doono 8,000-8,500 slsh sidii siyaasada Bangiga dhexe ahayd.

**Table 1:** Heerka Sarrifka Shilinka Somaliland ee USD oo sanadle ah Jan—September 2019 ilaa 2020

	2019		2020		Sannd-sannad
	Sarrif	Bil-bil	Sarrif	Bil-bil	
Jan	9,918	0.8%	8,670	2.0%	-12.6%
Feb	9,050	-8.8%	8,552	-1.4%	-5.5%
Mar	8,350	-7.7%	8,473	-0.9%	1.5%
Apr	8,450	1.2%	8,450	-0.3%	0.0%
May	8,380	-0.8%	8,470	0.2%	1.1%
Jun	8,350	-0.4%	8,550	0.9%	2.4%
July	8,390	0.5%	8,500	-0.6%	1.3%
Aug	8,454	0.8%	8,550	0.6%	1.1%
Sept	8,400	-0.6%	8,650	1.2%	3.0%
<b>Celcelis (Jan-Sept)</b>	<b>8,638</b>		<b>8,541</b>		<b>-1.1%</b>
Rubuc 1	9,106		8,565		-5.9%
Rubuc 2	8,393	-7.8%	8,490	-0.9%	1.2%
Rubuc 3	8,415	0.3%	8,567	0.9%	1.8%

**Jaantus 2:** Heerka Sarrifka Shilinka Somaliland ee USD & Heerka Sicir-bararka u sarreeyey, Jan 2018—Sep 2020



**IL-wareed:** Xog laga helay Bangiga Dhexe ee Somaliland

### 5.3. Xawaaladdaha

Sadexbiloodka 3aad ee July ilaa September 2020, Somaliland waxa soo galay US\$348.9 million xawaalad ah, taas oo muujinaysa korodh dhan 29% marka loo eego Rubucii 2aad ee ka horeeyey iyo 36% uu kordhay marka la barbar dhigo Rucucii 1aad, halka uu 11.5% ka sareeyo isla wakhtigaa wakhtigeedii 2019. Korodhkan ka muuqada Sadexbiloodka 3aad ee lacagaha la soo diray waxay ka muuqdaan bishii July--- taas oo korodhku ahaa 34% marka loo eego bishii ka horeysay ee June. Dhanka kale, bilaha August iyo September waxa ka muuqda hoose u dhaca dhanka lacagaha la soo xawilay taas oo hoos u dhucu midkiiba yahay 20% iyo 9%.

Sidoo kale, waxa korodh ka muuqdaa Sadexbiloodka 3aad lacagaha la xawilo (outflow Remittances) marka loo eego Rubucii 2aad, 1aad iyo sadexdii bilood ee u dhigmayey isla sanadkii hore, korodhkas oo kala ah 40%, 15% iyo 11.3%. Marka loo eego si bille ah, lacagaha dalka laga xawilo waxay aad u badnaayeen bisha July oo ay kordheen (23%) halka ay hoos u soo dhaceen bishii ku xigtay ee August (-2%) hadana ay kor u yara kaceen bisha September (1%)



Waxa la yaableh in dhanka lacagaha loo soo xawilay iyo kuwa laga xawilay Somaliland ay adkaysi muujiyeen Sannadkan iyadoo ay jirto saameynta Xanuunka Covid-19 oo saameeyey dakhligii soo gali jirtay dad yowga Caalamka Shaxdan2 ee hoos ku taala waxay Muujinaysaa lacagaha dalka soo galay iyo kuwa ka baxay Jan-Sep 2020. Dhanka kale, waxay tani ina tusaysaa in sagaalkii bilood ee la soo dhaafay lacagaha dalka ka baxay ee laga xawilay ay ka badnaayeen lacagaha dalka soo galay ee loo soo xawilay, taas oo muujinaysa sawir aan fiicnayn marka laga hadlayo dhanka dhaqaalaha

**Table 2:** Xawilaadaha lacagaha la soo diray iyo kuwa laga diray Somaliland, Jan-Sept 2020

	Lacagaha la soo Xawiley	Isbedel bille (%)	Lacagaha laga Xawiley dalka	Isbedel bille (%)	Faraq
January	\$92,633,559		\$138,877,839		\$-46,244,280
February	\$82,313,265	-11%	\$125,182,322	-10%	\$-42,869,057
March	\$81,083,358	-1%	\$145,417,628	16%	\$-64,334,270
April	\$74,224,032	-8%	\$97,798,381	-33%	\$-23,574,349
May	\$94,386,736	27%	\$108,440,065	11%	\$-14,053,329
June	\$102,479,133	9%	\$128,605,262	19%	\$-26,126,130
July	\$137,335,281	34%	\$158,069,954	23%	\$-20,734,673
August	\$110,552,347	-20%	\$155,474,288	-2%	\$-44,921,942
September	\$101,070,217	-9%	\$156,273,614	1%	\$-55,203,397
<b>WADARTA</b>	<b>\$876,077,928</b>		<b>\$1,214,139,354</b>		<b>\$-338,061,426</b>

*IL-wareed:* Xog laga helay Bangiga Dhexe ee Somaliland

**Table 3:** Lacagaha loo soo Xawiley Somaliland Rubuca 1aad, Rubuca 2aad iyo Rubuca 3aad ee 2019-2020

	Lacagaha la soo Xawiley 2019	Isbedel Rubucle (%)	Lacagaha la soo Xawiley 2020	Isbedelka Rubucle (%)	Korodhka (%)
SADEXBILOODKA 1AAD	\$261,234,567		\$256,030,183		-2.0%
SADEXBILOODKA 2AAD	\$270,471,511	4%	\$271,089,901	6%	0.2%
SADEXBILOODKA 3AAD	\$313,003,797	16%	\$348,957,845	29%	11.5%
<b>Wadarta (JAN-SEPT)</b>	<b>\$844,709,875</b>		<b>\$876,077,930</b>		<b>3.7%</b>


*IL-wareed:* Xog laga helay Bangiga Dhexe ee Somaliland

**Table 4:** Lacagaha la xawiley Rubuca 1aad, Rubuca 2aad iyo Rubuca 3aad ee 2019-2020

	Lacagaha laga Xawiley dalka 2019	Isbedel Rubucle (%)	Lacagaha laga Xawiley dalka 2020	Isbedel Rubucle (%)	Korodhka (%)
SADEXBILOODKA 1AAD	\$395,297,388		\$409,477,790		3.6%
SADEXBILOODKA 2AAD	\$350,743,080	-11%	\$334,843,708	-18%	-4.5%
SADEXBILOODKA 3AAD	\$422,132,601	20%	\$469,817,857	40%	11.3%
<b>Wadarta</b>	<b>\$1,168,173,069</b>		<b>\$1,214,139,356</b>		<b>3.9%</b>

*IL-wareed:* Xog laga helay Bangiga Dhexe ee Somaliland

**Figure 1:** Xawilaadaha lacagaha loo soo diray iyo kuwa laga diray Somaliland, January - September 2020



## 5.4. Ganacsiga & Socdaalka

### 5.4.1. Dhoofinta Xoolaha

Wadarta Xoolaha dhoofay Sadex biloodka July ilaa September 2020, waxay dhamayd 595,861 Neef, taas oo muujinaysa kor u kac 108% ay ka badnaayeen Xoolihii dhoofay Rububii 1aad ee Sannadka iyo 58% ay ka badnaayeen Rubucii 2aad ee Sannadka. Dhanka kale, Xoolaha dhoofay July-September 2020, waxay waxoogaa ka yar yihiin Xoolihii dhoofay isla Sadexdii bilood ee u dhigmayay ee sanadaha 2018-2019. Xoolaha dhoofay Sadexbiloodka 3aad ee Sannadkan waxay 57% ka yar yihiin kuwii dhoofay isla bilahii u dhigmayay ee sanadkii 2019 halka ay 45% ka yaraayeen Xoolihii dhoofay isla sadexdii bilood ee july-sep 2018.

Intii u dhaxaysay bilaha January ilaa September 2020, Somaliland waxay dhoofisay Xoolo dhan 1,064,170 Neef halka ay isla sagaalkii bilood ee u dhignaa sanadkii 2019 ay dhoofisay 1,745,771 Neef, taas oo ina tusaysa in dhoofka Xooluhu hoos u dhacay 39% marka loo eego sanadkii 2019.

Hoos u dhacn ku yimid dhoofkii xooluhu wuxu ka yimid joojintii sucuudigu joojiyeen imashadii gudashada waajibaadka Xajka oo aynu u dhoofin jirnay Xoolo badan.

**Table 5:** Dhoofka Xoolaha January ilaa September 2019 and 2020

	Cabirka	2019	2020	Faraqa	Korodhka (%)
Xoolaha	Heads	1,745,771	1,064,170	-681,601	-39%
Geel	Neef	45,195	53,769	8,574	19%
Lo'	Neef	102,634	86,889	-15,745	-15%
Adhi	Neef	1,597,942	923,512	-674,430	-42%


*IL-wareed: Waaxda kastamka, W/H/Maaliyadda*

**Table 6:** Dhoofka Xoolaha oo bille ah, 2018 - 2020


	2018	2019	2020	Korodhka (%)
Jan	25,022	50,292	44,492	-12%
Feb	34,534	68,750	68,317	-1%
Mar	17,444	62,667	68,530	9%
Apr	32,214	84,853	49,956	-41%
May	32,214	61,328	64,573	5%
Jun	103,357	39,953	172,441	332%
Jul	241,608	893,599	404,996	-55%
Aug	842,349	454,654	91,272	-80%
Sep	8,920	29,675	99,593	236%
<b>Sub-Total</b>	<b>1,337,662</b>	<b>1,745,771</b>	<b>1,064,170</b>	<b>-39%</b>
Oct	8,252	37,499		
Nov	17,413	59,947		
Dec	34,139	55,214		
<b>Wadarta</b>	<b>1,397,466</b>	<b>1,898,431</b>		

*IL-wareed: Waaxda kastamka, W/H/Maaliyadda*

**Figure 2: Noocyada Xoolaha Dhoofay January & September 2019 & 2020**



**Figure 3: Wadarta Xoolaha dhoofay oo bile ah laga soo bilaabo January 2018 ilaa September 2020**



**5.4.2. Soodejinta <sup>1</sup>**

Qiiimaha soo dejinta ee Sadexbiloodka 3aad July-September 2020, waxay kor u kaceen 11.9% marka loo eego Rubucii 2aad ee April-June 2020, balse waxay ka hooseeyaan 0.6% isla rubucii 3aad ee u dhigmayey sanadkii 2019. Isu geynta Qiiimaha soo dejinta intii u dhexeysay bilaha January-september waxay ahayd 2.48 Trillion SLSH halka ay 2.54 trillion SLSH ka ahayd isla bilihii la midka ahaa ee 2019----- taas oo muujinaysa 2.4% Hoos u dhac ah. Hoos u dhacan waxa uu badiba ka muuqday bilaha January, April, May iyo August. Hoos u dhaca soo dejintu wuxu aad u hooseeyaa bisha January 2020, kaas oo 20% ka hooseeya bishii December 2019, halka uu 12.5% ka hooseeyo isla bishii u dhigmaysey ee sanadkii 2019.

<sup>1</sup> Soodejinta qiimayaal aan isbedelin ayaa loo gooyey Somaliland – taas oo macnaheedu yahay in qiimayaashu Buugga Qiimayntu aanu isbedel ku iman doonin sannadka. Waxa intaa dheer in qiimayaaasha ku qoran USD ee Buugga dib loogu qiimeeyey heerka Rasmiga ah ee Dawladda u degsan.

Iyada oo ay xayiraadaha ganacsi iyo kala-fogaanshaha adduunka oo dhan laga hirgeliyey uu la Yimid safmarka Covid-19, ayaa haddana waxsoodejinta Somaliland adkaysi muujisey. Haddaba, iyada oo dakhliga dadku hoos u dhacayo iyada oo la filayo in xawilaadda lacaguhu yaraadaan oo dakhliga xoolo-dhoofintu hoos u dhaco nuska dambe ee sannadka, kharashgalka dawladdu isna yaraado iyo maalgelinteedu, waxa in la fisho ay tahay in hoos u dhac ku yimaaddo waxsoodejinta. Xaaladdan waxa sii xumayn karta safmarka oo soolabakacleeya oo la yimaadda xannibaado hor leh, kala-durug iyo hakad ku yimaadda isu-socodka badeecadaha.

**Shaxda 4:** Qiimaha Soo dejinta Badeecooyinka Dhanka Qiimayaasha Jan-Sep 2019 iyo 2020, SLSH

Bisha	Qiimaha Soodejinta 2019 SLSH	Isbedelka Bille (%)	Qiimaha Soodejinta 2020 SLSH	Isbedelka Bille (%)	Korodhka (%)
Jan	282,596,307,584		247,240,297,790		-12.5%
Feb	248,035,470,100	-12.2%	272,971,541,289	10.4%	10.1%
Mar	280,593,948,836	13.1%	311,189,171,835	14.0%	10.9%
Apr	296,340,742,854	5.6%	281,627,372,834	-9.5%	-5.0%
May	314,610,270,489	6.2%	234,074,218,228	-16.9%	-25.6%
Jun	244,750,801,535	-22.2%	264,052,784,159	12.8%	7.9%
Jul	307,328,163,576	25.6%	284,216,323,101	7.6%	-7.5%
Aug	247,952,614,577	-19.3%	278,117,333,389	-2.1%	12.2%
Sep	322,324,085,621	30.0%	310,191,882,351	11.5%	-3.8%
<b>Wadarta</b>	<b>2,544,532,405,172</b>		<b>2,483,680,924,976</b>		<b>-2.4%</b>
<b>Rubuc 1</b>	<b>811,225,726,520</b>		<b>831,401,010,914</b>		<b>2.5%</b>
<b>Rubuc 2</b>	<b>855,701,814,878</b>	5.5%	<b>779,754,375,221</b>	-6.2%	-8.9%
<b>Rubuc 3</b>	<b>877,604,863,774</b>	2.6%	<b>872,525,538,841</b>	11.9%	-0.6%

*IL-wareed: Waaxda kastamka, W/H/Maaliyadda*

**Shaxda 5:** Qiimaha Soo dejinta Badeecooyinka Dhanka Cashuurta intii u dhexeysay January ilaa September 2020

Bil	Cashuurta Soodejinta 2019 SLSH	Isbedel Bille (%)	Cashuurta Soodejinta 2020 SLSH	Isbedel Bille (%)	Korodhka (%)
Jan	121,289,122,809		116,984,073,772		-3.5%
Feb	99,609,552,260	-17.9%	123,396,454,209	5.5%	23.9%
Mar	121,967,326,146	22.4%	125,469,657,239	1.7%	2.9%
Apr	121,160,396,065	-0.7%	122,779,249,952	-2.1%	1.3%
May	138,909,386,400	14.6%	97,612,169,543	-20.5%	-29.7%
Jun	100,192,747,830	-27.9%	125,824,869,765	28.9%	25.6%
Jul	131,915,857,109	31.7%	124,634,274,164	-0.9%	-5.5%
Aug	110,144,927,266	-16.5%	129,768,019,125	4.1%	17.8%
Sep	134,114,358,644	21.8%	143,231,106,405	10.4%	6.8%
<b>Wadarta</b>	<b>1,079,303,674,528</b>		<b>1,109,699,874,173</b>		<b>2.8%</b>
<b>Rubuc 1</b>	<b>342,866,001,215</b>		<b>365,850,185,219</b>		<b>6.7%</b>
<b>Rubuc 2</b>	<b>360,262,530,294</b>	5.1%	<b>346,216,289,260</b>	-5.4%	-3.9%
<b>Rubuc 3</b>	<b>376,175,143,019</b>	4.4%	<b>397,633,399,693</b>	14.9%	5.7%

*IL-wareed: Waaxda kastamka, W/H/Maaliyadda*

**Shaxda 6:** Tobanka Badeeco ee u Sarreeyey Soodejinta Dhinaca Qiimaha ee January ilaa September 2020

Faalo	Cabirka	Xadiga	Qiimaha	Qiimaha % uu ka yahay Wadarta Soodejinta
Qaadka	KGs	30,594,705	298,767,431,939	12.0%
Sonkorta	kabdad 50 KGs	2,426,260	231,837,839,621	9.3%
Saliidda Cuntada	Litters	67,353,616	209,262,867,857	8.4%
Baasta Makarooni	KGs	57,285,810	141,993,980,167	5.7%
Bariis	Kabdad 50 KGs	1,150,613	104,500,177,736	4.2%
Daqiiq	Kabdad 50 KGs	1,027,850	87,298,524,322	3.5%
Dharka aan Tollayn	Yaardi	109,679,954	84,841,755,470	3.4%
Caano boodhaha	KGs	10,273,927	71,831,749,498	2.9%
Dharka tolan	darsin	3,589,497	70,975,335,173	2.9%
Gaasta wax lagu karsado	M3	116,058	65,313,042,125	2.6%
<b>Sub-Total</b>			<b>1,366,622,703,908</b>	<b>55.0%</b>

*IL-wareed: Waaxda kastamka, W/H/Maaliyadda*



**Shaxda 7:** Tobanka Badeeco ee u Sarreeyey Soodejinta Dhinaca Cashuuraha ee January ilaa September 2020

Faallo	Cabirka	Xaddiga	Cashuurta	Saamiga Cashuurta ee soo dejinta (1%)
Qaadka	KGs	30,594,705	299,048,443,075	26.9%
Sigaarka	KGs	3,642,532	60,105,941,389	5.4%
Sonkorta	Kabdad 50 KGs	2,426,260	55,013,900,239	5.0%
Saliida Cuntada	Litters	67,353,616	49,403,235,295	4.5%
Baasta Makaroono	KGs	57,285,810	39,427,410,236	3.6%
Baabuurta Raaxada	Units	3,101	29,219,171,146	2.6%
Dharka aan Tolleyn	Yaardi	109,679,954	28,417,141,160	2.6%
Dharka Tollar	Darsin	3,589,497	27,511,119,261	2.5%
Gaasta wax lagu karsado	M3	116,058	25,569,128,516	2.3%
Barriis	kabdad 50 KGs	1,150,613	24,778,743,334	2.2%
<b>Sub-Total</b>			<b>638,494,233,652</b>	<b>57.5%</b>

Waaxda kastamka, W/H/Maaliyadda

**5.4.3. Tirada Konteenarada & Maraakiibka Dekedda Berbera Timid**

Intii u dhaxaysay January-september 2020, waxa dekedda Berbera ku soo xidhay 259 markab/doon halka wakhtigaa wakhtigiisii ee sannadkii hore ay tiradu ka ahayd 249, taas oo ka dhigan in Tirada Maraakiibta/Doonyaha yimid 2020 ay 11% ka sarreeyaan kuwii sannadkii hore yimid kana sareeyaan 10 Markab/doon. Waxa aad ku arki doontaan *Shaxda 9aad*, noocyada maraakiibta ee yimid dekedda Berbera. Marka laga tago Doonyaha iyo maraakiibta WFP, waxa muqata kor u kac weyn marka la barbar dhigo xilliga u dhigmey ee 2019.

Odoroska imaatinka maraakiibta ee dekedda Berbera sannadka qaybtiisa dambe ma sugna, waxa se la fili karaa hoos u dhac maadaama soodejinta hoos u dhac ku jiro. Haddii labacaclayn uu safmarka COVID-19 la yimaaddo, xaaladdu waa ka sii dari kartaa.

**Shaxda 8:** Tiradda Konteenarrada Yimid Dekedda Berbera, Jan-Sept 2019 iyo 2020

	konteenarro			
	2019	2020	Faraqa	Korodhka (%)
January	3,876	3,270	-606	-15.6%
February	2,971	3,715	744	25.0%
March	4,135	3,828	-307	-7.4%
April	4,159	5,496	1,337	32.1%
May	4,124	4131	7	0.2%
June	5,019	3577	-1,442	-28.7%
July	4,854	3,762	-1,092	-22.5%
Aug	4,338	3,750	-588	-13.6%
Sept	3,833	3,970	137	3.6%
<b>Wadarta</b>	<b>37,309</b>	<b>35,499</b>	<b>-1,810</b>	<b>-4.9%</b>
<b>Rubuc 1</b>	<b>10,982</b>	<b>10,813</b>	<b>-169</b>	<b>-1.5%</b>
<b>Rubuc 2</b>	<b>13,302</b>	<b>13,204</b>	<b>-98</b>	<b>-0.7%</b>
<b>Rubuc 3</b>	<b>13,025</b>	<b>11,482</b>	<b>-1,543</b>	<b>-11.8%</b>

Waaxda kastamka, W/H/Maaliyadda

**Shaxda 9:** Tirada Maraakiibta ee Sadexbiloodka ah ee Berbera Yimid Jan-ilaa Sep 2019, 2020

	Maraakiib/doonyo			
	2019	2020	Faraqa	Korodhka (%)
Sadexbiloodka 1aad	130	99	-31	-23.8%
Sadexbiloodka 2aad	40	89	49	122.5%
Sadexbiloodka 3aad	79	71	-8	-10.1%
<b>Wadarta</b>	<b>249</b>	<b>259</b>	<b>10</b>	<b>4.0%</b>

**Shaxda 10:** Nooca & Tirada Maraakiibta Timi Dekedda Berbera January ilaa Sep 2019 iyo 2020

Nooca Markabka	2019	2020	Faraqa
Cunto-Qaad	60	80	20
Konteenar-xambaar	60	76	16
DOON	91	40	-51
Shidaal	11	22	11
Xamuul-Qaad	9	17	8
Kale	6	13	7
WFP	12	11	-1
<b>Wadarta</b>	<b>249</b>	<b>259</b>	<b>10</b>

*Waaxda kastamka, W/H/Maaliyadda*

**5.4.4. Tirada Rakaabka ku Yimid Hawada**


Sadexbiloodka 3aad ee 2020, waxa Somaliland hawada ku yimid 13,468 qof, taas oo muujinaysa korodh badan marka la barbardhigo 488 yimid rubucii ka horeeyey, halka uu ka yaryahay tiradii timid wakhtigaa wakhtigiisii 2019 oo ahayd 34,793. Si la mid ah Rakaabka ka gooshay ama ka tegey dalka Rubucii 3aad waxay ahaayeen 13,933 halkii ay isla rubucii 2aad ka badnaayeen 1,924, islamarkaana ka yaraa 29,471 tiradii dadkii dhoofay isla wakhtigaa wakhtigeedii 2019. Guud ahaan intii u dhaxaysay January-September 2020, Somaliland tirada dadka ku Yimid diyaarad waxay dhamaayeen 34,396 halka marka la barbar dhigo isla sagaalkii bilood ee sanadkii hore ay ahaayeen 85,963, taas oo muujinaysa inay tirada dadka soo maray hawadu ka yaraayeen 60% intii sanadkii 2019. Dhanka kale tirada dadka ka dhoofay dalka sagaalkii bilood ee aan soo dhaafnay waxay dhamaayeen 37,455, halka isla sagaalkii bilood ee u dhigmayey ee sanadkii 2019 ay ahaayeen 93,273, taas oo muujinaysa inay ka yaradeen 60% tiradii dalka ka dhoofay sagaalkii bilood ee Jan-Sep 2019. Hoos u dhacn waa mid la filayey marka la milicsado xayiradihii socdaallada lagu soo rogey April ilaa June 2020. Iyada oo Somaliland qaadday xayiraaddii socdaallada June 30, waddamo kalena sidoo kale laaleen, waxa la filayaa in imaatinka iyo tegidduba kor u kacaan. Kor u kacaan waxa dabrikara safmarka oo soo laba-kacleeya, qiimaha safarka sida baadhista, karantimooyinka, iwm oo caqabad kale ah ayaa hoos u dhigi kara dakhliga imaatinka dhoofka. Sidaa darteed, waxa la filayaa in tirooyinku ka yaraadaan kuwii xilliga la midka ah ee 2019 iyo sannadka inta ka hadhayba.

**Shaxda 11:** Tirada dadka Rakaabka Dhoofay ama Soo Degey bilaha, Jan – Sept 2019 iyo 2020

	Imaatin				Dhoofid			
	2019	2020	faraqa	Korodhka (%)	2019	2020	Faraqa	Korodhka (%)
<b>Jan</b>	7,309	7,444	135	1.8%	8,162	9,106	944	11.57%
<b>Feb</b>	7,025	6,964	-61	-0.9%	7,930	7,826	-104	-1.31%
<b>Mar</b>	7,812	6,032	-1,780	-22.8%	9,049	4,666	-4,383	-48.44%
<b>Apr</b>	7,812	28	-7,784	-99.6%	8,158	238	-7,920	-97.08%
<b>May</b>	8,107	142	-7,965	-98.2%	7,993	773	-7,220	-90.33%
<b>Jun</b>	13,105	318	-12,787	-97.6%	8,577	913	-7,664	-89.36%
<b>July</b>	16,529	4067	-12,462	-75.4%	13,769	3442	-10,327	-75.00%
<b>Aug</b>	11,385	4782	-6,603	-58.0%	16,950	4851	-12,099	-71.38%
<b>Sept</b>	6,879	4619	-2,260	-32.9%	12,685	5640	-7,045	-55.54%
<b>Wadarta</b>	<b>85,963</b>	<b>34,396</b>	<b>-51,567</b>	<b>-60.0%</b>	<b>93,273</b>	<b>37,455</b>	<b>-55,818</b>	<b>-59.84%</b>
Rubuc 1	22,146	20,440	-1,706	-7.7%	25,141	21,598	-3,543	-14.09%
Rubuc 2	29,024	488	-28,536	-98.3%	24,728	1,924	-22,804	-92.22%
Rubuc 3	34,793	13,468	-21,325	-61.3%	43,404	13,933	-29,471	-67.90%

*II-Wareed: Waaxda Socdaallada Somaliland*

**Jaantus 3:** Tirada Rakaabka Dhoofay iyo kuwa soo Degey oo Bille ah 2019 iyo Sep 2020,



## 6. Maalgelinta iyo Dhismaha

### 6.1. Tirada Ruqsadaha Ganacsi ee la bixiyey


Tirada liisannada ganacsi ee la bixiyey January ilaa September ee 2020, waa 915 halka ay 1,222 ka ahaayeen xilliga u dhigmeey ee 2019 ---- taas oo u dhiganta in ay hoos u dhaceen 25% ama tiro ahaan 307 ruqsadood.

Dhanka kale, tani waxay ka badan tahay 827 Ruqsadood tiradii ruqsadaha la bixiyey isla bilihii u dhigmayey ee 2018.

**Shaxda 12:** Tirada Ruqsadaha la Bixiyey Jan – Sept 2019 and 2020

	2019	2020	Faraqa	Korodhka (%)
Jan	129	107	-22	-17%
Feb	183	103	-80	-44%
Mar	192	109	-83	-43%
Apr	90	67	-23	-26%
May	94	52	-42	-45%
Jun	92	60	-32	-35%
Jul	180	131	-49	-27%
Aug	115	137	22	19%
Sep	147	149	2	1%
<b>Wadarta</b>	<b>1,222</b>	<b>915</b>	<b>-307</b>	<b>-25%</b>
Rubuc 1	504	319	-185	-37%
Rubuc 2	276	179	-97	-35%
Rubuc 3	442	417	-25	-6%

**Jaantus 4:** Tirada Ruqsadaha la bixiyey oo bille ah 2018-2020



## 6.2. Sibidhka la soo dejiyey


Tirada Sibidhka soo degtay July ilaa September 2020, waxay 5% ka yarayd tiradii soo degtay isla wakhtigaa wakhtigeedii 2019. Dhanka kale, mudadii u dhaxaysay January ilaa September waxay 20% ka yarayd tiradii sidhidhka soo degey isla sagaalkii bilood ee hore ee sanadkii 2019.

Hoos u dhacaa laga arkayo sagaalka bilood ee hore waxa u sabab ah xanuunka Covid-19 oo guud ahaan waxyeeleeyey koriinkii uu sameynayey dhaqaaluhu.

**Shaxda 13:** Tirada kiishashka Sibidhka ee la soo Dejiyey Jan – Sept 2019 and 2020

	<b>2019</b>	<b>2020</b>	<i>Faraqa</i>	<i>Korodhka (%)</i>
<i>JAN</i>	602,727	23,520	-579,207	-96%
<i>Feb</i>	258,124	803,717	545,593	211%
<i>MAR</i>	420,106	23,826	-396,280	-94%
<i>Apr</i>	260,112	13,765	-246,347	-95%
<i>May</i>	648,482	816,115	167,633	26%
<i>Jun</i>	335,480	264,880	-70,600	-21%
<i>Jul</i>	186,866	283,022	96,156	51%
<i>Aug</i>	670,632	628,121	-42,511	-6%
<i>Sep</i>	202,242	91,567	-110,675	-55%
<b>Wadarta</b>	<b>3,584,771</b>	<b>2,948,533</b>	<b>-636,238</b>	<b>-18%</b>
<i>Rubuc 1</i>	1,280,957	851,063	-429,894	-34%
<i>Rubuc 2</i>	1,244,074	1,094,760	-149,314	-12%
<i>Rubuc 3</i>	1,059,740	1,002,711	-57,030	-5%

**Jaantus 5:** Tirada kiishashka Sibidhka ee la soo Dejiyey ilaa 2018



## 7. Shaqaalaysiinta Dawladda


Tirada shaqaalaha dawladdu waxa ay kor u kacday 45% laga soo bilaabo 2014 oo ay ahayd 14,312 iyo hadda oo ay tahay 20,805. Tani waxa ay ka tarjumaysaa korodhsiimada ay adeegyadeeda dawladdu kordhisay iyo fursadaha shaqo abuur ee ay sameysay.

**Shaxda 14:** Shaqaalaha Dawladda Dhexe 2014 ilaa 2020

Sannad	Shaqaalaha	Isbedelka %
2014	14,312	
2015	15,355	7%
2016	15,487	1%
2017	15,655	1%
2018	17,240	10%
2019	18,838	9%
2020	20,805	10%

*il: MoNPD iyo MoFD ee 2019 iyo 2020*

**Jaantus 6:** Shaqaalaysiinta Dawladda Dhexe 2014 ilaa 2020




## 8. Roobabka/Raxmaadka

Iyada oo lagu dhex jiro welwelka uu la yimid safmarka COCOD-19, ayaxa iyo baaxadda saamaynta bulsheed ama dhaqaale ee taban ee uu la yimid, ayaa haddana waxa war naallo leh u ah Somaliland inay heshay roob ku filan oo aan looga baqan abaar. Shaxda 7aad waxa ay tusaysaa qotada roobabka oo laga diiwaangeliyey 49 goobood. Sida muuqata, goobaha intooda badani waxa ay heleen roobab ku filan lixda bilood ee hore ee sannadka oo daboolaysa ugu yaraan halka u hoosaysa oo ah 350mm, taas oo lagaga baaqsan karo abaar sannadka inta ka hadhay.



Jaantus 7: Cabirka Heerka Roobabka (MM) ee laga Diiwaangeliyey Aagag Kala Duwan Jan ilaa June 2020



-wareed: Wasaaradda Horumarinta Beeraha

## 9. Mucaawinooyinka dibadda 2018

Waddanka Somaliland waxa soo gelayey mucaawimooyin dibadeed oo aan yarayn marka la eego xaddiyada laga hayo sannadaha 2017 iyo 2018. Marka laga reebo Sanduuqa Horumarinta Somaliland (SDF), waxa Somaliland ka soo galay hay'adaha aan dawliga ahayn, Qaramada Midoobey, GTZ iyo Bangiga Adduunka \$274.2 milyuun sannadkii 2018, Qaderkani waxa uu 17% ka sarreeyey mucaawimadii soo gashay 2017 oo dhammayd US\$233.6 milyuun. Caafimaadka ayaa ku dhowaad kala-badh labadaa sannadood ee 2017 iyo 2018 (41%) ka helay deeqaha dibedda. Dhinaciisa Sanduuqa Horumarinta Somaliland waxa uu soo geliyey waddanka US\$10.4 milyuun 2018. Lifaayada 1 & 4 ayaa muujinaya deeqaha dalka ka soo galay hay'ad kasta sannadaha 2017 iyo 2018.

Shaxda 15: Deeqaha Dibedda iyo meelaha ay ka Fuleen Sannadaha 2017 & 2018, US Dollar

WADAAGE	2017	2018	KORODHKA (%)
MAAMULKA	\$14,372,904	\$17,127,842	19%
DHAQAALAHA	\$13,704,548	\$30,297,085	121%
WAXBARASHADA	\$16,408,373	\$28,419,966	73%
CAAFIMAADKA & NAFAQADA	\$110,731,802	\$112,740,938	2%
KAABAYAASHA	\$7,788,476	\$11,175,953	43%
DEEGAANKA	\$5,290,676	\$10,409,740	97%
BIYAHA, FAYADHAWRKA, IWM (WASH)	\$22,933,504	\$17,589,304	-23%
WAXSOOSAARKA	\$14,062,271	\$18,640,389	33%
TAMARTA	\$450,845	\$281,342	-38%
KALE	\$27,883,113	\$27,478,593	-1%
<b>WADARTA</b>	<b>\$233,626,512</b>	<b>\$274,161,152</b>	<b>17%</b>

## 10. Warbixinta Waxqabadka Miisaaniyadda 2020

### 10.1. Dakhli Ururinta Jan-Sep 2020

Sagaalkii bilood ee Jan-Sep 2020, Dakhliga guud ee u soo xarooday Dowladdu wuxu dhamaa **1,419 tirilyan slsh** (Hal tirilyan afar boqol iyo sagaal iyo toban billion), kaas oo **9%** ka badan dakhligii soo xarooday isla sagaalkii bilood ee **Jan – Sep** 2019, oo dhamaa **1,305** tirilyan slsh.

Inkastoo tani tahay muuqaal togan, hadana ku talo-galkii Dakhliga la filayay in la helo **Jan-Sep 2020**, oo ahaa (1,532 tirilyan slsh) wuxu ka hooseeya **7%**.

Sababaha keenay in ku talo-galkii dakhligu is dhimo 7% wax aka mid ah, saamaynta uu keenay Xanuunka safmarka ee Covid-19, kaas oo guud ahaan dhaqaalihii Caalamka idleeyay, isla markaana Xukuumada Somaliland qaaday talaabooyin lagu xakamaynayo Faafitaanka xanuunka kuwaas oo keenay hoos u dhac ku Yimid ku talo-galkii Dakhliga sida:

- Xayiraadii isku socodka cirka
- Joojintii qaadka ee bishii Ramadan
- Dhimistii Cashuurta waxyaaba daruuriyaadka ah sida Raashinka
- Cashuur dhaafkii loo sameeyay qalabka Caafimaadka
- Joojintii Sucuudigu uu joojiyay xoolihii xajka 19.2 War- bixinta kharash-galka Jan-Sep 2020

### 10.2. Kharash-galka Dowladda Jan-Sep 2020-ka

Sida ka muuqata shaxda 16aad, January ilaa Septemper 2020, kharashka Guud ee ka baxay khasnada Dowladdu wuxu dhamaa 1,417 tirilyan slsh una dhiganta boqolkiiba 69% Miisaaniyadda 2020. Halka ku talo galkii kharash galku ahaa inuu baxa Jan-Sep 1,534 tirilyan slsh.

Ku talo galkii kharashka Jan-Sep 2020, waxa aan laga isticmaalin oo laga baaqsaday in la galo lacag dhan 117 bilyan slsh-una dhiganta 6%. Sababta loo isticmaali waayay kharashkaa aan kor ku soo sheegnay waa dhimistii kharshkaadka ee sida ku meel gaadhka ahayd loo hakiyay kharashkaadka Dowladda si aan xukuumadu u galin kharash dheeraada, isla markaana la isku dheeli tiro kharashka iyo dakhliga Maadaama ku talo galkii Dakhligu sida la saadaalinayo hoos u dhici doono 6% saamayntii Xanuunka Covid-19 awgeed.

**Shaxda 16:** Isticmaalka Miisaaniyadda Jan-Sep 2020

NOOCA KHARASHKA	MIISAANIYADDA	QOONDADA	KHARASHKA DHABTA AH	INTA MIIS LAGA ISTICMAALAY (%)
MUSHAHARKA IYO GUNNADA	986,137,710,878	733,908,413,769	707,587,880,681	74%
KHARASHKA ISTICMAALKA ADEEGA & ALAABTA HAWSHA	580,374,012,994	414,558,724,093	351,232,594,061	71%
MASHAARIICDA DOWLADDA	170,606,839,428	109,983,062,476	89,437,557,758	64%
KABKA	6,297,990,012	5,095,804,299	4,204,801,507	81%
KALMOOYINKA QAYBAHA KALE EE DOWLADDA	54,041,190,800	40,781,042,950	33,333,073,805	75%
DHISMAYAASHA IYO IIBSIGA HANTIDA RAAGTA	160,842,655,888	54,917,180,707	29,021,294,880	34%
DAYNTA	82,699,600,000	53,999,700,000	31,779,825,563	65%
KAYDKA QARANKA	5,000,000,000	3,750,000,000		75%
<b>WADARTA</b>	<b>2,046,000,000,000</b>	<b>1,416,993,928,294</b>	<b>1,246,597,028,255</b>	<b>69%</b>

## 11. Odoroska Dakhiga Sanad Miisaaniyadeedka 2021

Odoroska Dakhliga ee Sannadka 2021-ka oo ku salaysan aragtiyo taxader leh iyo kuwo rajo leh (togan) islamarkana u muuqda mid ka turjumaya xaaladaha dhaqaale ee dalka, hadaba odoroska Dakhliga ee Sannadka 2021-ka waxa uu ka iman doona qaybahan soo socda.

- Cashuuraha Macaashal Macaashka iyo Faa'idada
- Cashuuraha Ganacsiga Caalamiga ah sida soo dejinta iyo Dhoofka
- Cashuuraha Alaabta iyo Adeega
- Deeqaha dawladdaha iyo hayadaha Caalamiga
- Dakhliga libka iyo Adeega Dawladda
- Dakhliga hantida sida kirooyinka hantida Dawladda
- Daxhlida ganaaxyada

Dhanka kale Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddada waxa ay si rasmiya u joojin doonta Sannadka 2021-ka Dakhliyadda kasoo xarooda Saamiga kabka dawladda hoose iyo Macaashal macaashka Ganacsiga ee kastamadu horumariska u qaadi jireen, lacagtaas oo dhan (70 billion SLSh) una dhiganta 2% Dakhliga guud taasoo hoos u dhigi doonta Korodhka Odoroska Dakhliga 2021-ka.

### 11.1. Guud-marka Guud ee Odoroska Dakhiga 2021-ka

Yoolka Odoroska Dakhliga la hiigsanayo Sannadka 2021-ka waxa uu ka badan yahay **9%** ama (**171 billion SLSh**) marka la barbar dhigo Dakhliga dhabta ah ee soo xaroon doona Sannadka 2020-ka, sidaa darteed Odoroska 2021-ka waxa lagu saleeyay dakhliga dhabta ee soo xarooday mudada sagaalka bilood ee Sannadka 2020-ka iyo siyaasada dhaqaalaha guud iyo Maaliyadda ee sida:

- ❖ Wax-soosaarka guud ee dalka
- ❖ Heerka sicir bararka iyo sarifka lacagaha qalaad
- ❖ Dhoofka xoolaha nool
- ❖ Dhaqdhaqaaqa ganacsiga caalamiga ah

Halka qaar ka mid ah dakhliyadda si gaara loo eegay laguna saleeyay saamaynta safmarka COVID19 uu ku yeelan doono odoroska dakhliga 2021-ka, iyadoo Somaliland kala mid tahay wadamada jaarka iyo kuwa caalamka saamaynta safmarku ku yeeshay dhaqaalaha guud iyo dakhligii dawladda guud ahaanba.

### 11.2. Meelaha la filayo in uu ka yimaado korodhka Dakhliga 2021-ka

Waxa la filaya Sannadka 2021-ka in dakhligu kordho, ayadoo ay sabab u tahay qodobadan soo socda;

- Cashuuraha an tooska ahayn ee Badeecada soo dega iyo Cashuuraha saaran Badeecadaha iyo Adeega (GST); kor u kaca Badeecadaha soo dega iyo Fulinta siyaasada GST ayaa la filaya iyana in dakhli badan ka soo xaroodo Sannadka 2021-ka.
- Dardar galinta Cashuuraha Macaashal Macaashka iyo Cashuurta laga helo shaqalaha rayidka
- Markii ugu horaysay Sannadka 2020-ka dawladda Somaliland waxa ay fulisay cashuraha xakamaynta Alaabta iy Adeega, iyado Sannadka 2021 kor loo qaadi doona dhaqan-galka cashuuraha dhiman ee xakamaynta si kor loogu qaado Dakhliga Dawladda loona gaadho ujeeddada xakameynta laga leeyahay
- Qoondada la saari doono Qaadka ee daryeelka Dhimirka: Wasarada Horumarinta Maaliyadda ayaa hirgelin doonta qoondo la saaro qaadka oo loogu talo-galey Horumarinta Daryeelka iyo Daawaynta dadka Dhimirka wax ka qaba.
- Korodhka dhoofka xoolaha oo la rajaynayo inu kor u qaadmi doono Sannadka 2021-ka marka la barbar dhigo kalkan lagu jiro ee 2020-ka, saamaynta safmarka COVID19 oo keentay in Xajka la joojiyo Sannadkan 2020-ka taasoo hoos u dhigtay dhaqaalaha guud dalka, hadaba waxa la rajaynaya Sannadka soo socda 2021-ka in Dhoofka xoolahu kor u kaco.
- Dakhliyada ka imanaya Wasaradaha iyo hayadaha Dawladda 2021-ka; Wasarada shaqo galinta iyo arimaha bulshada ayaa la rajaynaya in kor loo qaado bixinta ruqsada shaqada Sannadka 2021-ka, Halka Wasarada boosaha iyo isgaadhsiinta la filayo inay soo ururiso dakhliyo badan oo ka imanaya isgaadhsiinta, Hirarka iyo boosaha, dhanka kale Wasaaradda Warfaafinta iyo Wacyi-galintu waxay kor u qaadi doonto ruqsadaha warbaahinta.


**Shaxda 17:** Soo Koobida Guud ee Dakhliga 2021-ka

Madax	FAAHFAAHIN		HAYADAHA IYO WASARADAHA		MIISAANIYADA
	C/Bariga	Kastamka	C/Bariga	Kastamka	378,676,457,417
					<b>1,642,245,360,896</b>
1140806	Daakhliga Faafinta & lidhehda		Wasaaradda Warfaafinta iyo Dhaqangelinta		1,415,285,598
1140807	Dakhliga kale ee Boosaha & Isgaadhsiinta		Wasarada Isgaadhsiinta iyo Tknolojiyada		10,886,452,009
1140808	Dakhliga Liisamada Ganac/& Ruqsooyinka		Wasaaradda Ganacsiga, Warshadaha iyo dalxiiska		20,404,779,702
1140813	Dakhliga Ruqsadaha Beeraha		Wasaaradda Horumarinta Beeraha		372,321,260
1140814	Dakh/Feega Kaluumaysiga Bada		Wasaaradda Xananada Xoolaha iyo Kalumaysiga		1,532,120,656
1140815	Dakh/Liisamada/Ruqsooyinka Macdanta		Wasarada Macdanta iyo Tamarta		503,270,593
1140809	Khidmada warqada ogalansha shaqada		Wasarada Shaqada iyo Arimaha Bulshada		3,000,000,000
1320101	Deeqda Hayadaha Caalamiga ah		Deeqda Bangiga Aduunka		3,500,000,000
1415001	Kirada Dekeda Berbera		Kirada Dekeda Berbera		35,000,000,000
1415002	Dakhliga Kirada Guryaha & Bakhaarada		Wasaaradda H/Guud		980,793,249
1420104	Dakhliga libka Khayraadka Dalka		Wasarada Deegaanka iyo H.Reer miyiga		572,932,532
1420105	Dakhliga gadida hantida Maguurta ah		libka Hantida Dawladda		2,200,662,876
1420202	Dakh/Nootaayoyinka		Wasarada Cadalada iyo garsoorka		209,563,214
<b>Sub-Total</b>	<b>Wasaradaha iyo Hayadaha</b>		<b>Wasaradaha iyo Hayadaha</b>		<b>80,578,181,687</b>
<b>Wadarta</b>					<b>2,101,500,000,000</b>

**11.3. Faah-faahin Goobaha uu Dakhligu ka imanayo 2021-ka**

Sida ka muuqata jaantuska sare 96% Dakhliga guud ee dawladda waxa uu ka iman doona Kastamada iyo Cashuuraha Beriga halka 4% uu ka iman doono Wasaradaha iyo Haya'ddaha kale ee dawladda. Saamiga ugu badan waxa uu ka iman doona Kastamada 78% halka cashuuraha Beriga ay noqon doonan 18%. Geesta kale, Saamiga kastamada ayaa wali ah kan ugu badan Dakhliga Dawladda dhawrkii sano ee u dambeeyay, Sababtoo ah Dakhliga ugu badan ee Dawladdu waxa u ku tiirsan yahay Kastamada dalka.

**Jaantus 8:** Saamiga Dakhliga ay ka yihiin Cashuuraha Berrigu, Kastamadu iyo Wasaaraddaha kale 2019-2021



**Shaxda 18:** Soo koobida Qaybaha Odoroska Dakhliga 2021-ka

	Dakhliga kutala-gelka 2020	Oodoroska 2021	faraq
<i>Macaashal Macaashka Ganacsiga iyo Faaidada</i>	53,016,722,247	38,597,928,345	-14,418,793,903
<i>Cashuuraha Shaqalaha Dawladda iyo kuwa Rayidka</i>	96,598,268,487	104,627,873,889	8,029,605,402
<i>Cashuuraha Badeecadaha &amp; Adeega</i>	601,049,803,546	693,653,695,275	81,603,891,729
<i>Ganacsiga Caalamiga ah</i>	940,695,681,336	1,060,064,260,762	119,368,579,426
<i>Cashuuraha Kale</i>	82,262,370,074	92,266,880,171	10,004,510,096
<i>Dakhliga kale</i>	156,931,318,127	112,289,361,559	-33,641,956,568
<i>Wadarta Dakhliga Guud</i>	<b>1,930,554,163,817</b>	<b>2,101,500,000,000</b>	<b>170,945,836,183</b>

## 11.4. Dakhlīga Kastamada oo Deegamaysan 2021-ka

Sida ka muuqata jaantuska sare ee Saamiga Kastamada gobalada dalka, kastamka Berbera ayaa ah kan dakhliga ugu badan kasoo xaroon doono 66.5% marka la barbardhigo kastamade kale ee dalka, Kastamka Kalabaydh oo ah kastamka labaad ee ugu dakhliga badan ayaa laga filayaa 21.3% saamiga dakhliga kastamada, halka kastamada Saylac iyo Madaarka Hargeisa ay noqon doonan 5.8% iyo 2.5%, dhanka kale kastamada kale ayaa noqon doona 3.9%.

**Shaxda 19:** Dakhlīga Kastamada oo Deegamaysan 2021-ka

Goobaha kastamka	Dakhliga kutalo-galka 2020	Oodoroska 2021	Faraqa	%
Allaybaday	451,848,041	520,419,139	68,571,098	15%
Abaarso	204,001,879	225,138,688	21,136,810	10%
Bali-gubadle	1,304,344,125	1,510,141,800	205,797,675	16%
Beer	1,633,009,413	1,746,981,318	113,971,905	7%
Berbera	966,892,470,099	1,091,420,969,165	124,528,499,066	13%
Borama	18,160,543,672	20,463,951,663	2,303,407,991	13%
Buroa	1,101,350,825	1,188,489,512	87,138,686	8%
Caasha-cado	4,346,500,492	7,080,843,999	2,734,343,507	63%
Caynabo	2,108,605,152	2,355,598,282	246,993,130	12%
Dilla	23,117,653	26,059,503	2,941,849	13%
Farawayne	2,091,206,548	2,415,488,735	324,282,187	16%
Hargeisa	1,053,230,111	1,239,336,063	186,105,952	18%
Kalabaydh	310,183,148,368	349,042,357,141	38,859,208,773	13%
Laascaanood	5,243,339,191	6,034,567,059	791,227,868	15%
Lug-haya	37,744,405	48,801,506	11,057,100	29%
Hargeisa Airport	31,654,655,751	40,255,703,160	8,601,047,409	27%
Ceerigaabo	1,588,559,911	1,829,718,790	241,158,879	15%
Wajaale	17,713,295,379	19,294,140,894	1,580,845,516	9%
Xariirad	495,985,340	553,296,208	57,310,868	12%
Zaylac	86,148,045,791	94,993,358,272	8,845,312,481	10%
<b>Wadarta</b>	<b>1,452,435,002,145</b>	<b>1,642,245,360,896</b>	<b>189,810,358,751</b>	<b>12%</b>

## 11.5. Dakhlīga Cashuuraha Beriga oo Deegamaysan 2021-ka

Sida ka muuqata jaantuska sare ee goobaha Cashuuraha Beriga dalka, saamiga ugu badan Cashuuraha Beriga waxa uu kasoo xaroon doona Hargeisa 67%, iyadoo Cashuuraha Beriga Berbera 19%, Burco 4.7%, Borama 4.6% iyo Gabiley 2%, Halka goobaha kale ee cashuuraha beriga noqon doonan 2.8%.

**Shaxda 20:** Dakhlīga Cashuuraha Beriga oo Deegamaysan 2021-ka

Goobaha Cashuuraha Beriga	Oodoroska 2021	Dakhliga kutalo-galka 2020	Faraqa	%
Berbera	71,831,104,450	63,593,714,613	8,237,389,837	13%
Borama	17,404,571,324	15,580,887,561	1,823,683,762	12%
Buroa	17,879,384,165	16,845,950,864	1,033,433,301	6%
Caynabo	873,491,123	860,803,688	12,687,435	1%
Ceerigaabo	4,573,560,828	4,096,902,953	476,657,875	12%
Gabiley	8,883,975,350	8,666,382,127	217,593,223	3%
Hargeisa	252,201,075,550	238,915,781,099	13,285,294,452	6%
Laascaanood	3,613,640,999	3,365,467,303	248,173,697	7%
Zaylac	1,415,653,627	1,300,754,440	114,899,187	9%
<b>Wadarta</b>	<b>378,676,457,417</b>	<b>353,226,644,648</b>	<b>25,449,812,769</b>	<b>7%</b>

## 12. Siyaasadda Miisaaniyada 2021

### 12.1. Meelaha Mudnaanta Laga siiyey Miisaaniyadda 2021-ka

Miisaaniyadda dawladda ee 2021, sida ku cad *Shaxda 21*, kharashgalka waxa loo leexiyey meelaha la is leeyahay waxay door ka geysanyaan Horumarka iyo Baahiyaha Aasaasigaa sida: caafimaadka, ammaanka, waxsoosaarka, warshadaha, horumarinta da'yarta, shaqalaysiinta, Doorashooyinka, Waxbarashada iwm).



**Shaxda 21:** Meelaha Mudnaanta la siiyey Miisaaniyadda 2021-ka

	TIIRKA	QAYBTA	TAFASIISHA			
1	MAAMULKA	Doorasho	Diiwaangelin Codayn			
		Ammaan	Doorasho	Saldhigyo Booliis Qoris ciidan Cusub Unugyada Gaarka u tababaran ee RRU Gawaadhida Gaafwareega Xarumha dib-sixidda (jeelasha) Ciidanka Ammaanka Internetka Unugyada Difaaca Bulshada Aqoonsiga qaranka		
			Maamul-daadejin	Siideynta/Qaybinta lacagaha Wasaaradda Horumarintu Maaliyaddadu u Qoondaysay Maamullada Maxalliga ah Taageerada Barnaamijka JPLG Xoojinta Xafiisyada Gobollada		
				Arrimaha Dibedda	Aqoonsiga	
				Dib-u-habayn	Maaliyaddada Dawladda Shaqo qaran	
			2	KAABAYAASHA	Tamarta	Qaybinta Tamarta Tamarta la cusboonaysiiyo
					Biyaha	Balli-qarbad Biyo-gelinta Magaalooyinka
					Jidadka	Dayactirka Jidadka dalka isku xidha Barnaamijyada Waddooyinka Bulshadu unugto
					Isku-Xidhka	Iskuxidh Internet
					3	BUSLHO
		Caafimaad	Cusbatallaada Daawaynta ee Gobollada Shaybaadh qaran			
		4	WAXSOOSAAR	Beero	Cilmibaadhis iyo Fidin Shaybaadhka Daawaynta Dhimirka ee Qaran Price protection	
Xoolo	Shaybaadh Qaran oo Caddeeya Caafimaadka Xoolaha Dhoofaya Suuqgeyn Caafimaad					
Kalluumaysi	Qaboojiyeyaal Tababar Doon Lagu tababaro Ardayda Akademiyada Berbera Shaybaadh Qaran oo lagu caddeeyo caafimaadka/fayosamida Kalluunka					
	Macdan-qodid			Baadhista Khayraadka Macaadiinta Shaybaadhka Macdanta/Shidaalka		
	Warshado			Dhul u gaar ah Warshadaha		
5	DEEGAAN			Horumarinta Reer Miyiga	Xarun Cilmi-Baadhiseed	
				Daaqsin	Seerayaal	
		Duurjoog	Dhul ka Caaggan Daaqa oo Duurjoogto Leedahay			
		Ilaalin	Seere-celiyeyaal			

## 12.2. Siyaasadda Maaliyadda (fiscal policy)

### 12.2.1. Isku dheeli tirka Dakhliga iyo kharashka

Siyaasada Miisaaniyadda ee 2021 waxay xooga saaraysaa in la isku dheeli tiro Dakhliga iyo kharashka. Taas oo macnaheedu yahay in miisaaniyadda 2021 lagu sargooyo Dakhliga dhabta ee la filayo Sannadka 2020, iyadoo laga shidaal qaadanayo Dakhliga dhabta ah ee ina soo galay **Jan-Sep 2020**. Tani waxay meesha ka saari doonta sidii hore u dhici jirtay in kharshku ka bato Dakhliga la filayo.

### 12.2.2. Kor u qaadida saamiga ay Cashuuraha berrigu ka yihiin Dakhliga guud

Siyaasada Miisaaniyadda ee 2021 waxay xooga saaraysaa in kor loo qaado saamiga Dakhliga Cashuuraha berrigu ka yihiin Miisaaniyadda guud iyada oo xooga la saari doono sal-balaadhinta Qeybaha Cashuuraha Berriga (Tax Base), Diiwaan-galinta Cashuur Bixiyayaasha iyo dhaqan galinta Cashuuraha libka iyo Adeega hawsha ee (GST-da)

### **12.2.3. Ilaalinta iyo kobcinta waxsoo-saarka gudaha**

Si loo dhiiri geliyo loona ilaaliyo wax soosaarka dalka, waxay siyaasada Miisaaniyadda 2021 dhiirigalinaysaa ilaalinta waxsoo-saarka gudaha isla markaana la dejiyay Siyaasado lagu ilaalinayo wax soosaarka gudaha sida:

- in la jideeyo Cashuur lagu ilaaliyo wax soo saarka gudaha.
- in suuq dibedeed loo raadiyo wax soo saarka gudaha.
- In daraasad laga sameeyo xaalada tartan dhaqaale ee wadamadda jaarka

### **12.2.4. Shaqaalaysiinta shaqaalihii ku meel gaadhka ku ahaa Wasaaraddaha iyo Hay'addaha**

Wasaaradda Horumarinta Maaliyaddadu iyadoo fulinaysa Go'aankii ka soo baxay Golaha Wasiiradda J SL oo lagu ansixiyey in shaqaale joogta laga dhigo shaqaalaha sida ku meel gaadhka ah u jooga Wasaaraddaha iyo Hay'addaha Dowladda, isla markaana la soo afjano shaqaale dambe oo ku meel gaadh ah ayaa waxa Miisaaniyadda 2021 lagu daray dhamaan Shaqaalihii ku meel gaadhka ahaa ee ka hawl gali jiray dhamaan Hay'addaha Dowladda marka laga reebo labada Wasaaradood ee Caafimaadka iyo Waxbarashada oo iyagana lagu dari doono sanadaha soo socda.

### **12.2.5. Sii wadida Mashruuca Shaqo Qaran**

Sidaan wada ogsoon nahay, waxa xukuumadu hirgalisay labadii sano ee dambeeyey Mashruuca Faa'iidada badan laga dheefay ee shaqo qaran, kaas oo shaqo Abuur u sameeyay in ka badan laba kun oo Jaamiciyiin Reer Somaliland ah. Kaas oo ay Dowladdu sanadkii 2018 ku bilowday 1,400 dhalin yaro ah, halka ay sanadkii ku xigay mashruuca shaqo qaran ahaa 700 oo qof.

Sidaa awgeed, siyaasadda Miisaaniyadda 2021 waxa ka soo baxday in la sii wado Mashruuca shaqo qaran, kaas oo loo qoondeeyay in la qaato 500 qof Sannadka 2021.

### **12.2.6. Kaydka ku -talo galka Dhacdooyinka lama filaanka (Contingency fund)**

Si qaranku uga gaashaaman karo intii awoodiisa ah arrimaha ay keenaan Masiibooyinka dabiiciga ah ee dunida ka dhacaya sida: Fatahaadaha, Duufaanaadaha, Abaaraha, Xanuunadda iyo wax kasta oo lama filaana, waxa miisaaniyadda 2021 looga qoondeeyay lacag lagula tacaalo arrimaha lama filaanka ah hadii ay dhacaan ilaahay inaguma keenee

### **12.2.7. Abuurida Sanduuqa Daryeelka Dhimirka**

Sida aan wada ognahay waxa si weyn dalka ugu soo badanaya tiradda dadka xanuunka dhimirka qaba, kuwaas oo meelo kala duwan iyo siyaabo kala duwan loola tacaalo. Haddaba, si daryeelka, daweynta iyo tayeynta maamulka goobahan kor loogu qaado, waxay Wasaaraddu u saaraysaa cashuurta qaadka 200 SL SH ah halkii Kiiloo (Per Kg).

Qoondadan wixii ka soo baxa waxa loo samayn doono sanduuq lagu daryeelayo dadka xanuunka dhimirku hayo.

### **12.2.8. Wareejinta kabka Dowladdaha Hoose si dhamaystiran**

Siyaasadda 2021, waxa ka soo baxay in lacagta kabka Dowladdaha hoose ay u qabato Wasaaradda horumarinta Maaliyaddadu oo ah 12.5%, si dhamaystiran loogu wareejiyo, si adeega ay bulshada u qabtaan kor ugu qaadaan uguna fuliyaan Mashaariic horumarineed.

### **12.2.9. Joojinta 0.5 Macaashal-Macaashkii Ganacsatada lagaga qadimi jirey Dekeda**

Waxa la isla qaatay in la joojiyo Sannadka 2021 lacagtii horumariska ahayd ee ganacsatada lagaga qaadi jiray Dekeda Berbera, taas bedelkeedana marka sanadku dhamaado ay si dhamaystiran u bixin doona Cashuurta Macaashul-Macaashka ee ku Waajibtay dhamaan ganacsatada.

### **12.2.10. Abuurida Sanduuqa wax ka qabashada Xanuunka Covid-19**

Sidaan wada ogsoon nahay, waxa Dunida ka dilaacay bilowgii Sannadka 2020, Xanuunka safmarka noqday ee Covid-19, kaas oo dhibaato laxaadle leh u gaystay guud ahaan Caafimaadka Bulshada iyo Dhaqaalihii Caalamaka.

Si hadaba Xukuumado uga gaashaamato soo laba kacylanta Xanuunka Covid-19 oo hadaba dalal badan ku soo laba kacleeyey, waxay Xukuumadu Miisaaniyadda 2021 u qorshaysay Qoondo loogu talo galay in lagula tacaalo oo si degdeg ah looga jawaabo fiditaanka Xanuunka

### **12.2.11. Joojinta qaadista lacagaha aan sharciga ahayn (illegal fees)**

Waxa jirta in Wasaaraddaha iyo Hay'addaha Dowladda Dhexe qaar ka mid ahi qaadaan lacago aan sharci ahayn. Sidaa awgeed, waxaan dhamaan la mamnuucay in la qaado lacago /ujuurooyin aan sharciga Maamulka Maaliyaddau Jideyn jideyn, isla markaana laga soo saari doono wareegto sharci ah

### **12.2.12. Fududeynta Nidaamka Cashuur bixinta.**

Siyaasadda Miisaaniyadda 2021 waxay dhiiriglinaysaa fududaynta nidaamka Cashuur bixinta, taasi oo qofka Cashuurta ku waajibtay si sahlan u bixin doono, isla markaana la sameeyay system-ka Electronic ah oo la yidhaahdo E-Cash, isla markaana uu qofku ku bixin karo Cashuurta lacagaha electronic ah ee lagu dhex isticmaalo Tilifoonka sida Zaad-ka iyo Edahab-ka. Dhinaca kale, waxa la hirgeliyey nidaam Electronic ah oo u saamaxaya Cashuur bixiyuhu in uu isaga oo jooga goobtiisa ganacsi ku soo bixin karo Cashuurta.

### **12.2.13 Dhiirri-gelinta Saraakiisha Dakhliga**

Si kor loogu qaado ururinta dakhliga loona gaadho yoolka odoroska 2021-ka, isla-markaana loo dhiirrigeliyo shaqaalaha ku hawlan dakhli-ururinta waxaa siyaasadda miisaaniyadda ee 2021-ka u qorshaysan:

- In mudnaanta dhiirri-gelinta ee miisaaniyadda wasaaradda la siiyo saraakiisha dakhli ururinta ee lagama-maarmaanka u ah shaqada dakhli-soosaarka;
- In wixii dhiirri-gelin dulsaar ah ee ka baxsan miisaaniyadda maaliyadda wasiirku jaangooyo islamarkaana habraac iyo wareegto ku faah-faahiyo

### **12.2.14 Hirgalinta dhamaan qaybihiisa kala duwan nidaam Xisaabeeda iswada ee (SLFMIS)**

Sidaan wada ognahay waxa qaabxisaabeedka dowladda lagu isticmaala nidaamka iswada ee Somaliland Finacial Information Sysytem (SLFMIS), sidaa awgeed waxa Miisaaniyadda 2021 qorshaysan in la dhaqan galiyo dhamaan qaybaha kale ee uu ka kooban yahay nidaamka SLFMIS isla markaana la gaadhsiiyo dhamaan Gobolada oo dhan.

### **12.2.15 Ka qayb qaadashada Diyaarinta Miisaaniyadda ee Bulshada rayidka ah**

Waxa jirtay in kulan wada tashi dhex maray Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda oo uu hogaaminayo Wasiirka W/Horumarinta Maaliyadda Dr. Sacad Cali Shire iyo Bulshada Rayidka ah, kulankaasi oo ka dhacay Jaamacada Hargeysa 15/7/2020.

Wuxu ahaa kulankaasi mid la isku weydaardaday arrimo badan oo kuseeya diyaarinta Miisaaniyadda 2021-ka, Wasaaraduna u aragtay inay muhiim tahay ka qayb qaadashada diyaarinta miisaaniyadda ee Bulshada rayidka ah, waxana ka soo baxay talooyin wax ku Ool ah oo laga xusi karo:

- Daryeelka iyo tixgelinta dadka naafada ah ama baahiyaha gaarka ah qaba
- Dhiirigelinta wax soo saarka
- Shaqo abuurka
- Tashiilka Miisaaniyadda
- Kordhinta cilmi baadhista si dakhliga oo kordhiyo jaamacaduhuna qeyb ka ahaadaan
- Xoojinta ganacsiga yaryar
- Raadinta dakhliyada maqan
- Mashaariicaynta 1% ka mid 2%-ka Gobolad bari
- Faah-faahinta Miisaaniyadda Dowladaha Hoose
- Kordhinta kabka Jaamacada nugaal

### **12.2.16 Waxyaabaha la xusi karo ee talooyinka laga tixgeliyey**

- Taakuleynta Ururada Naafada

- Kor u qaadida aqoonta Saxaafada
- Dhiirigelinta haweenaka da'yarta ah ee Saxaafada
- Xoojinta wax soo saarka gudaha lana hirgeliyey cashuurta xakameynt badeecadaha si loo dhiiri geliyo wax soo saarka gudaha
- Kordhinta jaamacadda Nugaal iyo Gebiley
- Shaqo abuurka
- Mashruuca daryeelka dadka dhimirka ah
- Kordhinta cilmi baadhista
- Mashaariicaynta 1% ka mid 2%-ka Gobolad bari
- Faah-faahinta Miisaaniyadda Dowladaha Hoose
- Tirakoobka daaraha iyo ganacsiga si dakhliga loo kordhiyo
- Fududeynta cashuur bixinta

## 12.3 Siyaasadda lacageed (Monetary policy)

### 12.3.1 Sicir bararka

Siyaasadda Miisaaniyadda 2021 waxay xooga saaraysaa xakamaynta sicir-barbarka, iyadoo yoolka Wasaaradda horumarinta Maaliyaddada iyo Bangiga dhexe yahay in lagu hayo sicir barbarka 5%-6%, taasoo la dhaqan galiyay siyaasado loogu haynayo sicir bararka 5% ilaa 6%. Sida:

- in isticmaalka shilling ka Somaliland la xoojiyo isla markaana shay kasta oo Dowladdu iibsanaayo lagu iibsado shilinka somaliland
- in lacagaha electoric ah ee lagu dhex isticmaalo mobile-da aan la iskugu diri Karin wax ka yar \$100

### 12.3.2 Isku bedelka Sarifka lacagaha

Siyaasadda Miisaaniyadda ee 2021 waxay xooga saaraysaa siyaasadda lacageed ee dhanka safirka lacagaha, taasi oo la doonayo in sarifka lagu hayo 8,000-8,500 slsh

## 13 Saamiga Wadaagayaasha ee Miisaaniyadda 2021-ka


Sida ka muuqta Jaantuska iyo Shaxdan hoos ku taala, kharashka ku baxa Hay'addaha Amniga waxa uu Miisaaniyadda Guud ka yahay 35.35%, taas oo kuu muujinaysa in Amnigu Miisaaniyadda guud ka yahay sadex meelood meel.

Dhanka kale, Wadaagayaasha Dhaqaalaha, Maamulka, Waxbarashada, iyo Caafimaadku waxay Miisaaniyadda Guud ka yihiin kala badh 49.37%, halka ay Wadaagayaasha Biyaha, Deegaanka, Tamarta, Kaabayaasha Dhaqaalaha, Wax-soo saarka iyo Qaybaha kale ka yihiin 15.28%.

**Shaxda 22:** Saamiga Wadaagayaasha Miisaaniyadda 2021

<b>Wadaagaha</b>	<b>Miisaaniyadda 2,020</b>	<b>Miisaaniyadda 2,021</b>	<b>faraq</b>	<b>Saamiga Miis Guud (%)</b>
Amniga iyo Difaaca	709,876,917,712	742,909,921,817	33,033,004,105	35.35%
Maamulka	393,540,678,447	405,907,600,126	12,366,921,679	19.32%
Dhaqaalaha	342,219,099,683	327,389,850,065	-14,829,249,618	15.58%
Waxbarashada	196,847,233,514	194,115,414,259	-2,731,819,255	9.24%
Caafimaadka	96,528,054,269	109,924,940,912	13,396,886,643	5.23%
Kaabayaasha Dhaqaale	91,342,077,060	98,808,675,871	7,466,598,811	4.70%
Qaybaha kale	96,127,113,469	99,645,294,195	3,518,180,726	4.74%
Wax-Soosaarka	54,254,418,603	55,740,201,441	1,485,782,838	2.65%
Deegaanka	25,371,489,002	29,327,559,871	3,956,070,869	1.40%
Biyaha iyo Fayo-Dhowrka	28,819,080,788	24,055,825,232	-4,763,255,556	1.14%
Tamarta	11,073,837,453	13,674,716,211	2,600,878,758	0.65%
<b>Wadarta</b>	<b>2,046,000,002,020</b>	<b>2,101,500,000,000</b>	<b>55,499,997,980</b>	<b>100.00%</b>

## Jaantus 9: Saamiga Wadaagaysaasha ee Miisaaniyadda 2021



### 13.3 Amaanka

Guud ahaan wadaagahani wuxuu Miisaaniyadda guud ka yahay 35.35%, taas oo udhiganta **742,909,921,817 SL.sh**, wuxuu muujinyaa korodh dhan **4.65%** marka loo eego Miisaaniyadda sanadkii hore 2020-ka ka, waana wadaagaha ugu Miisaaniyadda badan taas oo ay keenatay muhiimadda uu amniga iyo difaacu u leeyihiin waddanka.

Si hadaba loo adkeeyo Nabad-galyada, waxa Miisaaniyadda 2021-ka loo qoondeeyay aageyada hoos ku xusan sida:

- Tayaynta iyo kordhinta Ciidamada
- Qalabaynta Ciidamada sida gaadiidka, qalabka dabdemiska, qalabka isticmaalka socdaalka iyo qalabka caafimaadka
- Kor u qaadida adeegyada kale ee la xidhiidha isgaadhsiinta

### Shaxda 23: Wadaagaha Amaanka iyo Difaaca

Amniga iyo Difaaca	Miis 2020	Miis 2021	Faraqa	Korodhka (%)	Saamiga Miis Guud (%)
Ciidanka Asluubta.	69,287,666,608	70,428,733,885	1,141,067,277	1.65%	3.35%
Ciidanka Booliska.	134,785,031,865	152,003,164,878	17,218,133,013	12.77%	7.23%
Ciidanka Dab-Demiska Qaranka Somaliland	13,632,337,236	14,347,900,218	715,562,982	5.25%	0.68%
Ciidanka Ilaalada Xeebaha.	17,926,880,388	20,582,699,613	2,655,819,225	14.81%	0.98%
Ciidanka Qaranka.	363,556,319,438	368,790,205,113	5,233,885,675	1.44%	17.55%
Ciidanka Socdaalka.	13,483,498,091	15,659,878,308	2,176,380,217	16.14%	0.75%
Hayadda Sirdoonka Qaranka	20,273,615,049	21,308,527,674	1,034,912,625	5.10%	1.01%
Jimciyadda Muj.Sooayaal	2,454,350,000	2,433,607,500	-20,742,500	-0.85%	0.12%
Ciidanka Ilaaladda Madaxtooyada.	29,811,342,216	31,455,908,546	1,644,566,330	5.51%	1.50%
Wasaaradda Gaashandhigga.	44,665,876,821	45,899,296,082	1,233,419,261	2.76%	2.18%
<b>Wadarta</b>	<b>709,876,917,712</b>	<b>742,909,921,817</b>	<b>33,033,004,105</b>	<b>4.65%</b>	<b>35.35%</b>

### 13.4 Maamulka

Guud ahaan Wadaagahani waxay miisaaniyadda guud ka yahay **19.32%** kaas oo u dhiganta **405,907,600,126 SL.SH**. Sidaa darteed wadaagahani wuxuu ina tusayaa korodh ah **3.14%**. Wadaagaahni wuxuu Sannadka 2021-ka muhiimad gaar ah siiyey;

- Tayeynta shaqada iyo shaqaalaha;
- Ilaalinta hantidada Qaranka;
- Cadaalada, garsoorka iyo Xuquuqul insaanka;



- Doorashooyinka;
- Safaaradaha iyo qunsiliyadaha dibeda;
- Maamul daadajinta;
- Barashada datuurka iyo wadniyada;

#### Shaxda 24: wadaagaha Maamulka

Maamulka	Miis 2020	Miis 2021	Faraqa	Korodhka (%)	Saamiga Miis Guud (%)
Garyaqaanka Guud	4,208,516,972	4,763,918,119	555,401,147	13.20%	0.23%
Golaha Guurtida JSL.	35,011,332,064	34,733,785,474	-277,546,590	-0.79%	1.65%
Golaha Wakiilada JSL.	37,395,323,162	38,364,435,342	969,112,180	2.59%	1.83%
Guddida Diwaangalinta Ururada	2,665,363,200	2,669,900,040	4,536,840	0.17%	0.13%
Guddiga Doorshooyinka Qaranka.	34,140,054,669	34,025,004,705	-115,049,964	-0.34%	1.62%
Gudida Maamulwanaaga iyo La-dagaalanka Mus	3,760,376,196	4,586,235,935	825,859,739	21.96%	0.22%
Hanti-dhawrka Guud ee Qaranka.	12,766,512,894	13,607,796,500	841,283,606	6.59%	0.65%
Hay'adda Shaqaalaha Dawladda.	16,399,882,160	19,159,394,436	2,759,512,276	16.83%	0.91%
Komishanka dib u habaynta shuruucda	2,000,238,912	2,095,892,331	95,653,419	4.78%	0.10%
Max-kamadda Hoose.	32,350,103,914	36,262,986,972	3,912,883,058	12.10%	1.73%
Qasriga Madaxtooyada JSL.	819,000,000	819,000,000	0	0.00%	0.04%
W.Arrimaha Dibadda iyo Iskaashiga Caalamiga ah	47,620,844,707	48,387,720,327	766,875,620	1.61%	2.30%
Wasaaradda Cadaaladda & Garsoorka.	8,954,768,860	10,421,911,724	1,467,142,864	16.38%	0.50%
Wasaaradda Xidh Golayaasha iyo Arimaha Distorka	7,657,527,854	8,998,433,832	1,340,905,978	17.51%	0.43%
Xafiiska Madaxtooyadda.	88,424,207,167	82,282,948,968	-6,141,258,199	-6.95%	3.92%
Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka.	10,065,607,330	10,441,974,106	376,366,776	3.74%	0.50%
Guddiga Xaquuqal Insaanka Qaranka.	3,528,385,594	4,511,858,296	983,472,702	27.87%	0.21%
Madax-weyne ku-.Xigeenka JSL.	585,000,000	585,000,000	0	0.00%	0.03%
Maxkamadda Sare.	7,517,520,040	8,169,216,678	651,696,638	8.67%	0.39%
Wasaaradda Arrimaha Gudaha.	37,670,112,752	41,020,186,341	3,350,073,589	8.89%	1.95%
<b>Wadarta</b>	<b>393,540,678,447</b>	<b>405,907,600,126</b>	<b>12,366,921,679</b>	<b>3.14%</b>	<b>19.32%</b>

### 13.5 Caafimaadka

Guud ahaan wadaagahani wuxuu ka yahay Miisaaniyadda **5.23%** oo udhiganta **109,924,940,912SLSH**, Waxaanu muujinayaa korodh ah **13.88%**, waxaana Sannadkan 2021-ka muhiimada la siiyey;

- Dhamaystirka goobihii Caafimaadka ee ku jiray Miisaaniyadda 2021-ka-;
- Horumarinta iyo daryeelka cisbitaalada dhimirka;
- Gurmada Caafimaadka ee xaaladaha degdega ah sida Covid-19;
- Iibsiga qalabka Caafimaadka;
- Hirgalinta ilaalinta tayada Cuntada, Daawada iyo wixii la mid ah;
- Balaadhinta Cisbitaalada Gar-adag iyo Baki;
- Joogtaynta adeega Caafimaad ee Cisbitaalada Laascaanood iyo Ceerigaabo

#### Shaxda 25: Wadaagaha Caafimaadka

Caafimaadka	Miis 2020	Miis 2021	Faraqa	Korodhka (%)	Saamiga Miis Guud (%)
Hay'adda Dhawrista Tayada	4,773,733,538	6,456,478,503	1,682,744,965	35.25%	0.31%
Komishanka qaranka ee Mihnadlayaasha caafimadka	1,561,037,748	2,423,204,350	862,166,602	55.23%	0.12%
Komishanka Qaranka ee Xakamaynta HIV/ AIDS	3,280,833,901	4,117,133,147	836,299,246	25.49%	0.20%
Wasaaradda H. Caafimaadka.	86,912,449,082	96,928,124,912	10,015,675,830	11.52%	4.61%
<b>Wadarta</b>	<b>96,528,054,269</b>	<b>109,924,940,912</b>	<b>13,396,886,643</b>	<b>13.88%</b>	<b>5.23%</b>

### 13.6 Waxbarshada

Wadaagahani wuxuu Miisaaniyadda Guud ka yahay **9.24%** una dhiganta **194,115,141,259** SL.Sh wuxuu muujinayaa hoos u dhac ah **1.39 %**, waxaana hoos u dhaca sababay shaqaalihii shaqo qaranta ee dufacadii kowaad oo Wasaaradda laga wareejiyey lagnu wareejiyey Wasaaraddaha iyo Hay'adaha kale ee Dawladda, dhismayaasha iskuulada, labareeriyada iyo Jaamacadaha oo la fuliyey.

Hadaba waxaa Sannadkan 2021-ka mudnaanta la siiyey;

- Macalimiin cusub oo tiradoodu dhantahay 300 oo macalin
- Dhismayaasha iskuulo, Jaamacado iyo labareeriyada cusub
- Joogtaynta adeega waxbarashada ee dugsiyada dayaxa iyo Laascaanood

#### Shaxda 26: Wadaagaha Waxbarashada

Waxbarashada	Miis 2020	Miis 2021	Faraqa	Korodhka (%)	Saamiga Miis Guud (%)
Agaasinka Tacliinta sare	6,381,661,158	5,462,706,158	-918,955,000	-14.40%	0.26%
Gudiga Tacliinta Sare	2,674,112,898	2,386,766,898	-287,346,000	-10.75%	0.11%
Wasaaradda Waxbarashada & Sayniska	187,791,459,458	186,265,941,203	-1,525,518,255	-0.81%	8.86%
<b>Wadarta</b>	<b>196,847,233,514</b>	<b>194,115,414,259</b>	<b>-2,731,819,255</b>	<b>-1.39%</b>	<b>9.24%</b>

### 13.7 Tamarta

Wadaagahani wuxuu ka yahay Miisaaniyadda **0.65%** oo u dhiganta **13,674,716,211** SL.Sh. Wuxuu muujinayaa korodh ah **23.5%** taas oo ku timid abuurista komishanka Tamarta iyo mashruuca sahaminta Shidaalka. Wadaagahani wuxuu muhiimada saarayaa;

- Sidii loo helilaha xog dhamaystiran oo ku saabsan shidaalka iyo macdanaha kala duwan eek u jira Dalka;
- Dhismaha Xarunta laabka macdanta Berbera;
- Nidaaminta iyo tayeynta korontada dalka;
- Ka hortagida iyo yaraynta khataraha Korontada;
- Helida koronto jaban oo macquul ah;

#### Shaxda 27: Wadaagaha Tamarta

Tamarta	Miis 2020	Miis 2021	Faraqa	Korodhka (%)	Saamiga Miis Guud (%)
Koomiishanka Tamarta		1,717,750,806	1,717,750,806		0.08%
Wasaaradda Macdanta & Tamarta.	11,073,837,453	11,956,956,405	883,127,952	7.97%	0.57%
<b>Wadarta</b>	<b>11,073,837,453</b>	<b>13,674,716,211</b>	<b>2,600,878,758</b>	<b>23.49%</b>	<b>0.65%</b>

6

### 13.8 Waxsoo-saarka

Waxsoo-saarku wuxuu Miisaaniyadda 2021-ka ka yahay **2.65%** una dhiganta **55,740,201,441** SL.Sh. Wadaagahani wuxuu muhiimada saarayaa;

- Cilmi baadhista iyo fidinta Beeraha;
- Badbaadada Beeraha;
- Xog ururinta iyo abuur badinta;
- Dhismaha dekada Maydh;
- Daawaynta iyo shaybaadhka Xoolaha;
- Xoolaynta Dadka danyarta ah;
- Horumarinta tijaabada taranka iyo calafka Xoolaha.

### Shaxda 28: Wadaagaha Waxsoo-saarka

Wax-Soosaarka	Miis 2020	Miis 2021	Faraqa	Korodhka (%)	Saamiga Miis Guud (%)
Wasaaradda H. Beeraha.	16,660,693,515	19,576,178,698	2,915,485,183	17.50%	0.93%
Wasaaradda Xanaannada Xoolaha iyo H. Kalumaysiga	37,593,725,088	36,164,022,743	-1,429,702,345	-3.8%	1.72%
<b>Wadarta</b>	<b>54,254,418,603</b>	<b>55,740,201,441</b>	<b>1,485,782,838</b>	<b>2.74</b>	<b>2.65%</b>

### 13.9 Deegaanka

Wadaagahani Miisaaniyadda Guud wuxuu ka yahay **1.4%** oo u dhiganta **29,327,559,871 SL.SH**, waxaanu muujinayaa korodh ah **15.59%**. Wadaagahani wuxuu muhiimada siinayaa;

- Ilaalinta Deegaanka iyo ka hortaga xaalufka;
- Seerayaasha;
- Daryeelka duurjoogta iyo ugaadha;
- Ka jawaabida xaaladaha degdega ah ee ay keenaan Masiibooyinka debiiciga ah.

### Shaxda 29: Wadaagaha Deegaanka

Deegaanka	Miis 2020	Miis 2021	Faraqa	Korodhka (%)	Saamiga Miis Guud (%)
Hayada u Diyaargarowga Aafooyinka iyo Kaydka R.	8,541,977,224	10,189,099,111	1,647,121,887	19.28%	0.48%
Wasaaradda Degaanka & Horumarinta Reermiyiga	16,829,511,778	19,138,460,760	2,308,948,982	13.72%	0.91%
<b>Wadarta</b>	<b>25,371,489,002</b>	<b>29,327,559,871</b>	<b>3,956,070,869</b>	<b>15.59%</b>	<b>1.40%</b>

### 13.10 Biyaha

Wasaaradda biyaha oo ah Wasaaradda kaliye ee ku jirta wadaagahan waxay Miisaaniyada guud ka tahay **1.14%** una dhiganta **24,055,825,232 SL.Sh**. Wasaaraddan waxaa ka muuqda hoos dhac ah **-16.53%** taas oo ay keentay mashaariic la fuliyey Sannadka 2020-ka oo dhamaaday. Wadaagahani wuxuu Sannadkan xooga saarayaa;

- Dhamaystirka Dhaamamka biyaha;
- Ceelasha Boorama iyo farawayne;
- Biyo balaadhinta Hargaysa iyo Gabiley;
- Iibsiga qalabka sahaminta biyaha;
- Iibsiga qalabka shaybaadhka biyaha;
- Qaadashada Shaqaalaha khirada u leh biyaha;

### Shaxda 30: Wadaagaha Biyaha Biyaha

Biyaha iyo Fayo-Dhowrka	Miis 2020	Miis 2021	Faraqa	Korodhka (%)	Saamiga Miis Guud (%)
Wasaaradda H. Biyaha	28,819,080,788	24,055,825,232	-4,763,255,556	-16.53%	1.14%
<b>Wadarta</b>	<b>28,819,080,788</b>	<b>24,055,825,232</b>	<b>-4,763,255,556</b>	<b>-16.53%</b>	<b>1.14%</b>

### 13.11 Dhaqaalaha

Wadaagahani wuxuu ka yahay Miisaaniyadda guud **15.58%** oo u dhiganta **327,398,850,065 SL.Sh**, wuxuu muujinayaa hoos u dhac ah **-4.33%**. Hoos u dhacan waxaa sababay mashaariic ku jirta wadaagahan oo dhamaaday sida Taaga soo haga maraakiibta oo loo iibiyey Dekada Berbera.

Wadaagahani wuxuu muhiimada siinayaa;

- Qorshaha guud ee Qaranka;
- Dakhli korodhinta;
- Dib u-habaynta maamulka Maaliyaddada;
- Maamul daadajinta nidaamka kharash bixinta;

- Dhiirigalinta maalgashiga;
- Daahfurnaanta nidaamka qandaraasyada Qaranka;
- Shaqo abuurka.

### Shaxda 31: Wadaagaha Dhaqaalaha

Dhaqaalaha	Miis 2020	Miis 2021	Faraqa	Korodhka (%)	Saamiga Miis Guud (%)
Guddiga Qandaraaska Qaranka.	3,053,313,868	3,910,155,257	856,841,389	28.06%	0.19%
W.Qorshaynta & Horumarinta Qaranka	11,005,169,950	12,535,147,015	1,529,977,065	13.90%	0.60%
Wasaaradda H. Maalgashiga	4,898,525,982	5,749,117,992	850,592,010	17.36%	0.27%
Wasaaradda Ganacsiga, Warshadaha iyo Dalxiiska	49,462,327,287	23,497,910,268	-25,964,417,019	-52.49%	1.12%
Wasaaradda H. Maaliyaddada.	273,799,762,596	281,697,519,533	7,897,756,937	2.88%	13.40%
<b>Wadarta</b>	<b>342,219,099,683</b>	<b>327,389,850,065</b>	<b>-14,829,249,618</b>	<b>-4.33%</b>	<b>15.58%</b>

### 13.12Kaabayaasha Dhaqaalaha

Sida guud Wadaagahani wuxuu Miisaaniyadda guud ka yahay **4.7%** una dhiganta **98,808,675,871 SL.Sh.** Wuxuuna muujinayaa korodha ah **8.17%** marka loo eego sannadkii hore ee 2020-ka.

Wadaagahani wuxuu awooda saarayaa horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha sida;

- Horumarinta wadooyinka iyo Biriijiyada;
- Hirgalinta adeega boosaha;
- Isticmaalka Ticoonlajiyada ee adeega Haya'daha Dawladda;
- Nashqadaynta magaalooyinka;
- Diiwaan galinta hantida maguurtada ah;
- Diyaarinta xarumaha Tiknoolajiyada (ICT);
- Dakhli kordhinta;
- La socodka dhaqdhaqaaqa gaadiidka Dawladda;
- Horumarina madaarada;

### Shaxda 32: Wadaagaha Kaabayaasha Dhaqaalaha

Kaabayaasha Dhaqaale	Miis 2020	Miis 2021	Faraqa	Korodhka (%)	Saamiga Miis Guud (%)
H. Duulista & Hawada.	17,998,329,153	17,721,982,470	-276,346,683	-1.54%	0.84%
Wasaaradda Gaadiidka iyo H. Jidadka	46,547,032,664	50,444,691,087	3,897,658,423	8.37%	2.40%
Wasaaradda Hawlaha Guud, Dhulka & Guriyaynta	11,050,909,543	15,748,991,652	4,698,082,109	42.51%	0.75%
Wasaaradda Igaadhsiinta iyo Tignoolajiyada	15,745,805,700	14,893,010,662	-852,795,038	-5.42%	0.71%
<b>Wadarta</b>	<b>91,342,077,060</b>	<b>98,808,675,871</b>	<b>7,466,598,811</b>	<b>8.17%</b>	<b>4.70%</b>

### 13.13Wadaagaha kale (cross-cutting Sector)

Wadaagahan waxaa ku midaysan afar Wasaaradood iyo laba Hay'adood oo dhamaantood ay isugu yimaadaan adeegyada Bulshadu, waxay Miisaaniyadda guud ka yihiin **4.74%** oo u dhiganta

**99,645,294,195 SL.Sh.** waxaaynu muujinayaan korodh dhan **3.66%**. Wadaagahani wuxuu muhiimada saarayaa;

- Dhiirigalinta shaqo abuurka dhalinyarada;
- Horumarinta ciyaaraha;
- La dagaalanka iyo ka hortga mukhaadaraadka;
- Kor u qaadida kaalmooyinka bulshada ee kala duwan;
- Diiwaan galinta shaqaalaha ajaanibka ah;
- Dhismayaasha garoonada ciyaaraha.

**Shaxda 33:** Wadaagaha kale (cross-cutting sector)

Qaybaha kale	Miis 2020	Miis 2021	Faraqa	Korodhka (%)	Saamiga Miis Guud (%)
Hayada Qaxootiga iyo Barakacayaasha	6,616,908,417	8,974,162,201	2,357,253,784	35.62%	0.43%
Hay'adda Diiwaanka Sakada iyo Safalka	3,752,357,428	3,726,352,250	-26,005,178	-0.69%	0.18%
W. Warfaafinta, Wacyigelinta iyo Dhaqanka	45,376,093,468	43,104,243,446	-2,271,850,022	-5%	2.05%
Wasaaradda Ciyaaraha iyo Dhalinyarada.	17,858,671,892	18,748,718,410	3,518,180,726	3.66%	0.89%
Wasaaradda Diinta & Awqaafta.	9,241,733,392	9,873,119,572	631,386,180	6.83%	0.47%
Wasaaradda Shaqagalinta, A. Bulshada & Qoyska	13,281,348,872	15,218,698,316	1,937,349,444	14.59%	0.72%
<b>Wadarta</b>	<b>96,127,113,469</b>	<b>99,645,294,195</b>	<b>3,518,180,726</b>	<b>3.66%</b>	<b>4.74%</b>

## 14 Soo Koobida Qeybaha Miisaaniyadda 2021-ka

Sida ka Muuqata Shaxdan Hoose iyo Jaantuskan hoose, kharashka ku baxa Shaqaalaha oo ka kooban Mushaharooyin iyo Gunooyin waxa ay Miisaaniyadda Guud ka yihiin in ka badan kala badh 51.67%--- taas oo ina tusaysa in kala badh Miisaaniyadda Dowladdu ku baxo Mushaharooyinka.

Sidoo kale, kharashka ku baxa Shaqaalaha waxa uu kordhay 9.33% marka loo eego sanadkii hore oo uu Miisaaniyadda guud ka ahaa 48.44%, korodhkan ayaa ka imid 1,610 shaqaale ku meel gaadh ahaa oo Sannadkan Miisaaniyadda lagu daray, 500 oo shaqaale cusub ah oo Mashruuca shaqo qaran ah, iyo Macalimiin iyo korodh Ciidan cusub.

Dhanka kale, kharashka hawl socodsiintu waxa uu Miisaaniyadda Guud ka yahay 26.29% --- halka uu sanadkii hore ka ahaa 26.26%, taas oo Muujinaysa in Siyaasadda Miisaaniyadda 2021 ay ku salaysan-tahay in aan la kordhin kharashka hawlsocodsiinta.


Mashaariicda Dowladda, Dhismayaasha iyo libsiga hantida Raagtaa waxay Miisaaniyadda 2021 ka yihiin 12.98%, halka Deymaha, kharashka lama filaanka, Kaalmooyinka qeybaha kale ee Dowladda iyo Keydka Qaranka ka yihiin Miisaaniyadda 9.07%.

**Shaxda 34:** Soo koobida Qeybaha Miisaaniyadda 2021

Qeybaha Miisaaniyadda	Miis 2020	Miis 2021	Faraqa	Korodhka (%)	Saamiga Miis Guud (%)
Mushaharooyin Iyo Gunooyin	993,087,863,702	1,085,772,241,357	92,684,377,655	9.33%	51.67%
Kharashka Hawl-Socodsiinta	537,843,600,182	552,461,330,471	14,617,730,289	2.72%	26.29%
Mashaariicda Dowladda	169,008,689,428	163,744,401,884	-5,264,287,544	-3.11%	7.79%
Dhismayaasha iyo Hantida Raagta	158,068,655,888	108,994,635,488	-49,074,020,400	-31.05%	5.19%
Deymaha	75,000,000,000	75,000,000,000	-		3.57%
kharashka lama filaanka	61,100,000,000	61,245,000,000	145,000,000	0.24%	2.91%
kaalmooyinka Qaybaha Dowladda	46,891,190,800	49,282,390,800	2,391,200,000	5.10%	2.35%
Kaydka Qaranka	5,000,000,000	5,000,000,000	-		0.24%
<b>Wadarta</b>	<b>2,046,000,000,000</b>	<b>2,101,500,000,000</b>	<b>55,500,000,000</b>	<b>2.70%</b>	<b>100.00%</b>



## Jaantus 10: Soo koobida Qeybaha Miis 2021



### 14.3 Kharashka Shaqaalaha

Kharashka ku baxaya shaqaalaha sannad miisaaniyadeedka 2021-ka waa **1,085,772,241,357**, SL.Sh kaasoo **51.67%** ka ah miisaaniyadda guud ee 2021-ka. Kharashkani wuxuu ka badan yahay **9.33%** miisaaniyaddii 2020-ka oo ahaa **993,087,863,702** SL.Sh

Taana waxa keenay sababahan hoos ku xusan:

- 300 oo macallin oo loo kordhiyey Wasaaradda waxbarashadda;
- Tirade ciidamada oo la kordhiyey;
- Shaqaalihii aan joogtada ahayn ee Wasaaraddaha iyo Hay'adaha Dawlada oo la shaqaalaysiiyey;
- Shaqaalihii Shaqada Qaranka oo dufacadii sadexaad 500 qof la qoondeeyey iyo dufacadii kowaad iyo tii labaad oo miisaaniyadda si dhamaystiran loogu daray

### 14.4 Hawl socodsiinta

Kharashka loo qoondeeyey hawl socodsiinta hay'addaha dawladda sanad miisaaniyadeedka 2021-ka waa **552,461,330,471** SL.Sh. Marka loo eego sannadkii 2020-ka, oo uu ahaa **537,843,600,182** SL.Sh, waxay ka badantahay **2.72%** Miisaaniyaddii hore waana farqi ah **14,617,730,289** SL.Sh. Guud ahaan wuxuu kharashkani Miisaaniyadda guud ka yahay **26.29%**. Korodhka kharashkani wuxuu ka tarjumayaa:

- Dardargelinta shaqada hay'addaha dawladda iyo hawlaha amniga;
- Hay'addo cusub oo Dawladda ku soo kordhay;
- Hay'ado gaar loo lahaa oo ay dawladdu la wareegatay;
- Adeegyada ay dawladdu qabato oo sanadba Sannadka ka denbeeya si xawli ah u kordhaya;
- Fidinta Maamulka iyo adeegyada dawlada ee gobolada iyo dagmooyinka dalka.

### 14.5 Hantida Raagta

Miisaaniyadda loo qoondeeyey Hantida raagta waa **108,994,635,488** SL.Sh, waxay Miisaaniyadda Guud ka tahay **5.19%**. Hantida raagta waxaa loola jeedaa dhismeyaasha, Gaadiidka, Mishiinada, Doonayaha iyo hantida raagta ee kale. Waxaana kamid ah hantidan:

- Dhismeyaash sida: Jaamacada Gabiiley iyo Library-yada,
- Dhismeyaasha iskuulada Kaladuwan iyo dhamaystirka garoomada ciyaaraha;
- Dhismeyaasha Xanaanooyin Cusub;
- Dhismaha buundooyinka Ceerigaabo iyo birijka Gabiiley;

- Dhismaha Ceelasha biyaha gabiley iyo boorama;
- Iibsiga Gaadiidka kala duwan ee dawladda sida Gaadiidka Ciidanka Booliska iyo Ciidanka Qaranka;
- Dhismaha Dekeda Maydh, Bakhaarka keydka raashinka ee Berbera iyo Hoolka Hay, adda Shaqaalaha;
- Iibsiga qalabka Caafimaadka ee Cisbitaalka Ciidanka Qaranka;
- Iibsiga Saanadda Ciidanka;
- Iibsiga Qalabka socodaalka iyo deb-demiska;
- Iibsiga qalabka caafimaadka ee Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka;

#### 14.6 Mashaariicda Kale ee Dawladda

Miisaaniyadda loo qoondeeyey Mashaariida kale ee dawlada ee aan ahayn ta Hantida raagta waa **163,744,401,884 SL.Sh**, taas oo Miisaaniyadda guud ka noqonaysa **7.79%**.

Mashaariicada 2021-ka waxaynu ka tilmaami karnaa;

- Mashruuca shaqo qaran;
- Mashaariicda Caafimaadka iyo waxbarashada ee Sool iyo Sanaag
- Mashaariicda Beeraha
- Mashaariicda Xoolaha
- Mashaariicda Deegaanka iyo daryeelka ugaadha
- Mashaariicda Sahaminta Macdanta iyo Shidaalka
- Mashaariicda Hirgalinta E-Government-ka, Samaynta furuaha Dal ku galka Isgaadhsiinta iyo hirgalinta Xarumaha ICT-ga
- Mashruuca hirgalinta boosta
- Mashaariicda Horumarinta dhalinyarada iyo qabashada koobka liigaga
- Mashaariicda Horumarinta Wadooyinka iyo Madaarada
- Hirgalinta Doorashooyinka Baarlamanka iyo Dawladaha Hoose
- Mashaariicda Horumarinta Gobolada Bariga iyo Maamul daadejinta
- Diyaarinta Aaga warshadaha (Industrial Zone)
- Mashruuca horumarinta cisbitaalada dhimirka

#### 14.7 Kaalmooyinka Dawladda

Miisaaniyadda loo qoondeeyey Kaalmooyinka Dawladda siiso qayabaha kala duwan ee bulshada waa **49,282,390,800 SL.Sh**, taas oo Miisaaniyadda guud ka noqonaysa **2.35%** waxaanay Miisaaniyaddii hore ee 2020-ka badantahay **5.10%** taas oo ahahayd **46,891,190,800 SL.Sh**. Korodhkana wuxuu ku yimid;

- Kaalmada Xarunta barashada dastuurka oo la qoondeeyey
- Kaalmada Xisbiyada oo sideedii lagu soo celiyey
- Kaalmada suxufiyinta sida SOLJA, WIJA, FIMS iyo Dawan

#### 14.8 Daynta Qaranka

Daynta kharashka loogu talagalay waxaa weeyi **75,000,000,000** waxaanay la midtahay dayntii sanadkii hore, waxayna Miisaaniyadda guud ka tahay **3.57%**

#### 14.9 Keydka Qaranka iyo Kharashka lama filaanka ah

Miisaaniyadda loo qoondeeyey keydka qaranka iyo kharashka lama filaanka ah waa **62,245,000,000 SL.Sh**, taas oo miisaaniyadda guud ka noqonaysa **2.96%**, waxaana lagu talagalay in loo siticmaalo xaaladaha degdega ah ee lama filaanka ah sida;


- Xanuunada sida degdeg ah u dilaaca;
- Difaaca dalka;

➤ Afooyinka debiiciga ah.

## 15 Mashaariicda ay Maalgeliyaan Qaadhaan bixiyayaashu (World BANK, SDF AND JPLG)

Waxaa jira in ay Qaadhaan bixiyeyaal kala duwan inaga taageeraan Mashaariic Horumarineed oo kala duwan kuwaas oo laga fuliyo Dalka gudihiisa, sidaas darteed Sanad Miisaaniyadeedkan 2021-ka waxaa jira Lacago aan ka helayno Qaadhaan bixiyayaasha, lacagtaas oo ku jirta Miisaaniyadda 2021-ka waxaa lacagta Cadadkeedu Dhanyahay **164,629,613,120 SI.sh**, una dhiganta **\$23,518,163**, Lacagtan oo ka badan Lacagtii Sanadkii hore aan ka helney oo ahayd **146,351,429,000 SI.sh** una dhiganta **\$20,907,346** faraqa u dhexeeyaa waa **18,278,184,120 SI.sh** una dhiganta **\$2,611,169**, dhanka boqolaydana ka badan boqolkiiba (12.49%).

**Jaantus 11:** Deeqaha Qaadhaan bixiyayaasha ee Miisaaniyadda 2021-ka



Mashaariicdan waxaa ka Mid ah:

### 15.3 Mashraariicda Baanka Aduunka

#### 15.3.1 Mashruuca Dib u Habaynta Shaqaalaha Dawladda

Mashruucan oo ay ku baxayso Miisaaniyad dhan **17, 500,000,000 SI.sh** waxaa Maalgalinaya Baanka Aduunka isagoo ay fulinayso Hayada Shaqaalaha Dawladda, Meelaha ugu mudan ee wax lagaga qabanayo waxaa ka mid ah:

- Tayeynta shaqada iyo shaqaalaha Dawladda;
- Horumarinta Siyaasada lagu hagayo shaqaalaha dawlada;
- Tirakoobka Shaqaalaha;
- Qalabaynta Xafiisyada Ha'yada shaqaalaha iyo Machadka shaqaalaha Dawladda;
- Shaqaaleysiinta Dadka xirfada iyo Aqoonta Fiican leh oo loo qatey Wasaaraddo gaara.

#### 15.3.2 Mashruuca Horumarinta korontada

Mashruucan oo socday sanadkii 2020-ka waxaa Maalgaliyey Baanka Aduunka isagoo ay fulinayso Wasaaradda Macdanta iyo Tamarta, Mashruucan lacagta ku baxaysa Sanad Miisaaniyadeedkan 2021-ka waxaa ay dhantahay **14, 928,802,000 SI.sh**. Meelaha ugu Muhiimsan ee Mashruucani mudnaanta siinayo waxaa ka mid ah:

- In Awooda la saaro Tamarta Qoraxda;
- In meelaha fog iyo Ganacsiga yar yare ee ku yaalaa helaan Laydh;
- In la qiimeeyo noocyada kala duwan ee koronto ee dalku u baahanyahay;

### 15.3.3 Mashruuca Dib u Habaynta Maamulka Maaliyaddada Qaranka

Mashruucan oo in Mudo ah socday waxaa Maalgalinaya Baanka Aduunka lacagta lafilayo inay ku baxdo Sannadkan 2021-ka waxay dhantahay **31,489,095,120 SI.sh**, Meelaha ugu Mudan ee awooda la saarayo Sannadkan waxaa ka mid ah:

- Xoojinta Dakhliga;
- Nidaamka Casriga ah ee Diyaarinta Miisaaniyadda;
- Isticmaalka Miisaaniyada (Budget Execution);
- Sameynta Siyaasadaha Horumarinta Maamulka Maaliyaddada;
- Tayeynta warbixin Xisaabeedka (Financial Reporting);
- Kor u qaadida shaqada Hanti-dhawrka Guud;
- Xoojinta qiimaynta dhaqaalaha ee Gudiga dhaqaalaha ee Golaha Wakiilada;
- Dardargalinta xoojinta nidaamka shaqada Gudiga dabagalka iyo ilaalinta Hantida ee Golaha Wakiilada;
- Qalabaynta Xafiisyada waaxaha kala duwan ee Wasaaradda Maaliyaddada, Hanti-dhawrka, iwm;
- Tayeynta Shaqaalaha Wasaaradda Maaliyaddada, Xisaabaadka, Hanti dhawrka, iyo Baanka dhexe.

### 15.4 Sanduuqa Horumarinta Somaliland (SDF)

Sanduuqan oo ay Somaliland ka caawiyaan dhawr dal oo kala ah Dawladda Ingiriiska, Denmark iyo Netherland (Holland), waxaa uu awooda saaraa dhinaca Horumarka sida Beeraha, Kallumeysiga, Wadooyinka, Xoolaha iwm, Sannadkan 2021-ka Lacagta Sanduuqa lagu shubayaa waa **88,111,716,000 SI.sh** una dhiganta **\$12,587,388** waxay ka badantahay sanad Miisaaniyadeedkii 2020-ka boqolkiiba (**17.85%**). Meelaha Mudnaanta uu sanduuqu siinayo waxaa ka mid ah:

- Dhismaha Dakada Maydh ee Kalluumeysiga;
- Dhismaha Wadada isku xidha Berbera iyo Burco;
- Biyo Baladhinta Caasimada Hargeysa ee isku xidhka ceelasha Laasdhure ilaa Geed-Deeble;
- Ilaalinta Nabaad guurka Dhulka Gobolka Maroodijeex
- Biyo Balaadhinta Degmada Boorama
- Caafimaadka iyo Horumarinta waxsoosaarka Xoolaha

